



URURKA DAWLADAHA HOOSE EE SOMALILAND (ALGASL)

MAGGAALO

MAGAZINE


JANUARY 2024

CADADKA 18AAD

Warsidaha Magaalo oo u taagan soo bandhigidda arrimaha khuseeya Degmooyinka Somaliland, Sida Adeegyada Aasaasiga ah ee u fidiyaan muwaadiniinta, Waxqabadka iyo hindisayaasha horumarineed ee ka socda guud ahaan dalka.

Warsidahan waxa kale oo diirada lagu saaraa sidii loogu soo bandhigi lahaa guulaha ay gaadheetn degmooyinka iyo sida ay ugu kala duwan yihiin adeegyada iyo sida ay qorshayaasha u samaystaan si ay wax ugu kala bartaan maadaama oo warsidahan Magaalo uu wada gaadho degmooyinka wadanka oo dhan arrintana waxay abuuraysaa wada sheekaysi iyo wax kala barasho si loo kobciyo garaadka iyo aqoonta hawl wadeenada degmooyinka iyo sidoo kale bulshooyinka kala duwan ee ku dhaqan degmooyinka, waxaan iyaga Meesha ka maqneyn oo Warsidahan lagu soo bandhigaa caqabadaha soo wajaaha Dawladaha Hoose si xal loogu raadiyo.

KU SOO DHAWAADA WARSIDAHHA MAGAALO OO AY UDUB DHEXAAD U YIHIIN DEGMOOYINKA SOMALILAND!



KOOXDA TAFATIRKA CADADKAN

KA QAYBQAATAYAASHA UGU MUHIIMSAN

AMANI YUUSUF

CABDILAAHI MAXAMED

WAXAA KALOO AANU U MAHAD CELINAYNAA

MUKHTAAR DAYIB

AXMED NAASIR

SHUCAYB CABDILAAHI

MUKHTAAR AXMED

SICIID NUUX

IYO CID WALBA OO QAYB KA QAADATAY SOO SAARISTA MAGAALO MAGAZINE CADADKAN 18AAD

NASHQADAYNTA: CABDILAAHI MAXAMED CABDI

BOGA FALCELINTA AKHRISTAHA


SU'AALAHA


1. Magacaaga oo seddexan iyo magaalada aad joogtid?
2. Maqaal kee ayaa ku soo jiiday ama aad ka heshay cadaddkan?
3. Qiimayn ku samee qaabka loo qoray maqaalkaas?
4. Maxaad talo soo jeedin lahayd in la badalo ama lagu soo kordhiyo magazine?
5. Maxaad is leedahay cadadka danbe halaga hadlo?
6. qiimee nashqada magazine (warsidaha)?

WIXII FALCELIN AH HALKAN NOOGU SOO HAGA AJI

Tell: +252 63 3829426
Tell: +252 63 3241022

Email: abdilahi.mohamed@algasl.org
Email: amani.yusuf@algasl.org

 [Facebook.com/ALGASL](https://www.facebook.com/ALGASL)

 [X.com/ALGASL](https://www.x.com/ALGASL)



ALGASL PROFILE

The association of local government authorities of somaliland (ALGASL) is a non-profit organization and was established by the local government and mayors in february 2006 in hargeisa to provide support to the local authorities, coordinate activities that benefit the performance of the local government institutions and their employees, it has derived its reason for existence from the decentralization process, which is meant to transfer authority, resources, responsibility and accountability from central to local government.

ALGASL is the sole membership organization for local governments in somaliland that aims to achieve a democratic, participative local government that is more responsive to the needs and aspirations of the citizens resident in somaliland.

ALGASL focuses on developing and providing services to municipalities through support to capacity development, promoting closer collaboration among districts, and harmonious and efficient relations with somaliland's central.

VISION

Our vision is to unite local governments in somaliland and provide

them with a platform to meet and exchange experiences / best practices that can be replicated throughout the country as it works with the society to promote the social and economic well-being of all citizens through just end democratic local governance.

MISSION

To build strong local governments in somaliland through advocacy and lobbying, sharing knowledge, building capacity, forging partnerships and effective integration in the nation, and to transform the association into a vibrant organization that effectively represents its members and contributes to improved service delivery.

VALUES

ALGASL members share core democratic values and standards and:-
Believe that effective elected local government is an important foundation of democracy,
Recognize the importance of local democracy and good governance, community, empowerment, and effective decentralization as a means to reduce poverty and realize sustainable development, and
Committed to the integration of key values of democracy and gender sensitivity in people-centered development processes and the respect for

human rights, peace, and justice are central to our mission.

ALGASL CONSTITUTION MANDATE

ALGASL constitutional mandate aims to transform local government authorities to achieve their full development potential in somaliland as summarized in the subsequent section:

- Formulate policies to support the improvement and development of local governance, effective management in local authorities, and the enhancement of local democracy in somaliland.Promote forums for discussion on matters of common interest and/or concern to local authorities, including special interest groups and a means by which joint views may be formulated and expressed.
- Regulate the relationship between its members and their employees within the meaning of somaliland.
- Labour / employment law and a membership observation of the international labour standards.

MAXAA HORUMAR KA SOGDA DEGMOOYINKA



CEERIGAABO

SAAMAYNTA WADDO
XUMADU AY KU LEEDAHAY
DHAQAALAH A DEGMA DA.

BOGGA 12

BOORAMA

MASHRUUCA CAGAARINTA
BOORAMA. BOGGA 14

OODWEYNE

DHISMAHA KAABAYAASHA.

BOGGA 17

BERBERA

MASHRUUCA DHIR BEERISTA.

BOGGA 18

BERBERA

XEEBTA BATALAAL E. BOGGA 19

GABILEY

MASHRUUCA LAMBARINTA
GURYAHA IYO WADOOYINKA.

BOGGA 20

HARGEYSA

BEERTA NASASHADA
DADWEYNAHA. BOGGA 22

BURCO

TODDOBAADKA OLOLAHA
NADAFADA. BOGGA 26

GAR-ADAG

HORMARINTA BILICDA
MAGAALADA GAR ADAG.

BOGGA 29

BAKI

SAAMAYNTA WADDO
XUMADU AY KU LEEDAHAY
DHAQAALAH A DEGMA DA.

BOGGA 32

SHEEKH

HORUMARINTA ADEEGA
WAXBARASHADA. BOGGA 36

SHEEKH

BEERTA NASASHADA IYO
FAGAARAHA KHAYRIYADA.
BOGGA 37

MAARAYNTA KHATARAHA IYO MASIIBOYINKA

WAJAALE

MASIIBADII KU HABSATAY

WAJAALE. BOGGA 8

M.KH.M EE DALKA

MAXAAD KA OGTAHAY
AAFOOYINKAIYO
MASIIBOYINKA. BOGGA 10

XEERKA M.KH.M

DOORKA DAWLADAHA
HOOSE IYO KA JAWAABIDA
MASIIBOYINKA. BOGGA 11

LUGHAYA

DHIBAATADA UU GEEDKA
GARANWAAGU KU HAYO
DEEGAANK. BOGGA 13

SAYLAC

BARNAAMIJKA LA
QABSIGA ISBADALKA

CIMILADA. BOGGA 16

GABILEY

MAARAYNTA XANUUNKA
XUMADDA. BOGGA 21

HARGEYSA

MASHRUUCA MAARAYNTA
KHATARTA DHAAMKA DAAMI
IYO BADBAADINTA 150 QOYS.
BOGGA 24

CEEL-AFWEYN

DIB U HESHISIINTA BEELAHA
WAALALAH A. BOGGA 27

LAAS-QOREY

LA DAGAALANKA
DEEGAAMEYSIGA. BOGGA 28

SALLAXLEY

DABAR GOYNTA GEEDKA

GARAN-WAAGA. BOGGA 30

BALIGUBADLE

FAYADHAWRKA QASHINKA
BOGGA 33

CAYNABA

DAAD GURAYNTA DADKA IYO
SAAMEYNTA DAGAALADA.
BOGGA 34

DHAHAR

DABAR-GOYNTA XALUFINTA
DEEGAANKA. BOGGA 35

DANWADAAG

BOGGA 42



MASIIBADII KU HABSATAY MAGAALO GANACSIYEEDKA WAJAALE

Magaalada wajaale oo ah magaalo-xuduudeed xidhiidhisa Somaliland iyo Itoobiya, waxay xudun u tahay ganacsiga u dhexeeya labada dal, waana suuqa labaad ee halbowlaha u ah dhaqaalaha dalka kulmisana ganacsatada keena badeecoyinka iyo bulshooyinka kala duwan ee ka adeegta.

17-Kii Sebtember, 2023 dab xoogan oo ka kacay qayb ka mid suuqa wayn ee magaalada Wajaale kaas oo saameyn ba'an ku yeeshay degmada wajaale iyo dhamaan suuqyada Somaliland.

Waxaa si wada jir ah uga qab qaatay maamulka heer qaran, heer gobol, heer degmo iyo dalalka jaarka sida dawlad deegaanka Soomaalida Itoobiya, iyo dagmooyinka Somaliland ee u dhaw wajaale sida Hargeysa, Gabiley iyo Boorama ayaa ka qayb qaatay soona afjaray masiibadaas ku habsatay suuqa Wajaale.

Sidoo kale muwaadiniinta ayaa gacmaha is qabsaday si ay gacan uga geystaan badbaadinta alaabta

iyo ka daadgureynta meelaha ay dhibaataadu saameysey.

Inkasta oo ay dadaal badan sameeyeen, haddana dabku waxa uu noqday mid aad uga awood badan in la damiyo waxaana sababay cidhiidhiga waddooyinka iyo baaxadda dabka oo ahaa mid aad u mug wayn.

Dabkani waxaa uu baabiiyey oo dambas ka dhigay dukaamo, bakhaarro iyo dhammaan meheradihii kala duwanaa ee goobtaas, taas oo dhabar jab ku noqotay ganacsatadii iyo dhaqaalihii dalkaba kaas oo lagu qiimeeyay khasaaraha soo gaadhay shan milyan iyo sadex kun oo doolar USD 5.3m. Masiibadaasi waxay saamaysay dhaqaalaha bulshada gaar ahaan ganacsatada yaryar.

Ka hortaga masiibooyinka iyo takulaynta dadka u nugul khataraha isbadalka cimilada iyo kuwa dad sameega ah sida dabka, dufaanada iyo abaaraha waa masuuliyad ina saran ahna in looga wada qayb qaato dawladd iyo bulshaba.

Guud ahaan degmooyinka dalka ee awood u lahayn la dagaalanka dabka waxay u baahan yihiin in la siiyo kaalmo dhaqaale, khibrad farsamo, iyo agabka lagula dagaalamo dabka, sidoo kale waa in la wanaajiyo tallaabooyinka badbaadada hantida shacabka iyo in la sameeyo qorshooyin lagaga hortago ama lagu yarayno. Saameynta ay leedahay masiibooyinka midka dabiiciga ah iyo kuwa dad sameega ahba.

Ururka dawladda hoose ee Somaliland (ALGASL) ayaa isagoo ka jawaabayada masiibada dabkaas wuxuu lacag dhan lix boqol oo kun oo doolar (\$600,000) ku wareejiyey guddida taakulaynta dib u dhiska suuqa Wajaale.

“Iskuduubni loo wada dhanyahay ayaa lagu wacnaadaa, hadaan si wada jir ah looga qayb qaadan Horumarka lagu wadeecowye”

ALGASL



©Ridwan Buraale

MAXAAD KA OGTAHAY AAFOOYINKA IYO MASIIBOYINKA KA TAAGAN SOMALILAND

HORDHAC:

Somaliland waxay ku taal dhul oomane ah oo u nugul isbadalka cimilada. Waxaana ka dhaca masiibooyin iyo khataro kala duwan oo saamayn taban ku yeesha nolol bulshada iyo kaabayaasha dhaqaalaha. Cimilada gaarka u ah deegaanada Somaliland ayaa ka dhigaysa mid u nugul khataraha kala duwan sida Abaaraha, Fatahadaha, Duufaannada, Colaadaha, xaalufka, iyo Cudurrada dillaaca.

Hadaba fahamka Khatarahan iyo masiiboyinkan ayaa muhiim u ah u diyaargarowga iyo diyaarinta qorshayaal wax ku ool ah.

Mawduuca cadadkan 18aad waxa uu dulmar ka bixinayaa afooyinka iyo khataraha guud ee ka jira Degmooyinka Somaliland waxaanu iftiiminayaa baahida loo qabo istaraatiijiyad dhamaystiran oo lagu yareeyo saamayntooda.

Hadaba maxaynu ka baran karnaa khatarahaas iyo afooyinkaas soo noq noqda ka dawlada hoose ahaan? sidee se waxa looga qaban karaa?

ALGASL

DOORKA DAWLADAHHA HOOSE KU LEEYIHIIN KA JAWAABIDA MASIIBOYINKA

Dawlada Hoose waxay kamid yihiin golaha xukuumada jamhuuriyadda Somaliland sida ku xusan dastuurka jamhuuriyadda Somaliland qodobkiisa 110aad, waxaana loo dajiyey sharci (xeer lr.23/2019) Lagu qeexay masuuliyadaha, xilka, waajibaadka, awooddaha shaqo ee degmooyinka iyada oo la waafajiyey mabaadii'da ku xusan qodobada 109aad, 110aad, 111aad iyo 112aad ee dastuurka si golayaasha degmooyinka dalku ay u noqdaan kuwa awood u leh hanashada adeegyada bulshada iyo horumarinta dhaqaalaha ee degaanadooda.

Haddaba xeerka lagu maamulo Dawladaha hoose ee xeer lr.23/2019 Ma lagu qeexay doorka dawlada hoose ee maaraynta khataraha masiibooyinka? Su'aashan jawaabteedu waa haa, waxaana ay si cad ugu qoran tahay qodobada ka hadlayaa xilka golaha deegaanka iyo masuuliyadaha waaxda arrimaha bulshada qodobadaas oo kala ah qodobka 40aad iyo qodobka 75aad oo u kala dhigan sidan:

1. Qodobka 40aad ee xeer lr.23/2019 Faqradiisa 2aad, xubnihiisa (g iyo h) waxay qeexayaan doorka golayaasha deegaanka ee latacaalida afooyinka dabiiciga ah sidana way udhigan yihiin:(xilka golaha deegaanka waxa kamid ah ka hor tagga dhibaataada abaarta, duufaannada, dabka halista ah iyo dhibaato kasta oo wax u dhimi karta dadweynaha iyo daad guraynta dadweynaha hadii aaf dhacdo)
2. Qodobka 71aad xeer lr.23/2019 Faqradiisa 1aad,

xubnihiisa d, numberka 6aad waxay udhigan tahay sidan xilka waaxda arrimaha bulshada waxa kamid ah daad-guraynta iyo u gargaarka dadweynaha haddii aaf ku dhacdo.

Inaga oo tixraacayna qoddobada sharci ee sare ku xusan waxa muuqata in dawlada hoose ee dalka ay masuuliyad culusi ka saaran tahay sidii ay qayb uga noqon lahaayeen maaraynta, latacaalida, ka jawaabida khataraha iyo masiibooyinka dabaciiga ah, waqti xaadirkan waxa socda dadaalo ay dhamaan degmooyinka wadanku ay ku asaasaayaan xafiisyo iyo waaxyo uqaabilsan latacaalida khataraha iyo masiibooyinka, iyada oo ay hormood uyihiin degmooyinka Hargeysa iyo Burco.

ALGASL

HORUMARINTA WADOOYINKA

Maamulka Dawladda Hoose ee degmada Ceerigaabo ayaa mu-dooyinkii udambeeyay ku haw-lanaa dardargalinta hawlaha shaqo.

Degmada Ceerigaabo ayaa wa-dooyin muhiim ah ka hirgalisay magaalada, wadooyinka waxa ka kow ah wadada marta suuqa street 7 oo kamida wadooyinka ugu mashquulka badan magaalada Ceerigaabo, waxayna kamid tahay qorsheyaasha dawlada hoose ugu talo gashay inay fuliso sanadkan 2023 waa-na mid kamid ah balan qaadyadii dawlada hoose ee degmada Ceerigaabo.

Waxaana maamulka dawlada hoose fariin udiray shacabka degmada inay qaataan doorkooda ilaalina iyo qurxinta wadooyinka oo ah hanti la wada leeyahay.

DAWLADA HOOSE EE DEGMDA CEERIGAABO



DHIBAATADA UU GEEDKA GARANWAAGU KU HAYO DEEGAANKA

Dawladda Hoose ee degmada Lughaya ayaa fulisay hawlgal lagaga hortagayo dhibatada uu geedka garanwaagu ku hayo magaalada lughaya. Taaso ujeedka shaqadan ahayd, in la nadiifiyo magaalada lughaya. Lana yareeyo faafidda geedka garanwaga.

QORAAGA
CUMAR CISMAAN AADAN
AGAASIMAHA WAAXDA QORSHAYNTA D.H LUGHAYA


Hawshan waxa la qabtay bishii 10aad 2023 oo ay ka shaqaysay dawladda hoose oo kaashanaysa bulshada maalinkasta oo arbac ah oo lagu qaadi jiray olole nadaafadeed. Sidoo kale waxa mamulku sameeyay shaqaale u xil saran jarida geedka, kuwaa soo todobaadkii 3 maalmood shaqeeya.

Ujeedka loo qabtay shaqadani oo ahayd in geedka garanwaga oo dhibaato badan ku hayey bulshada degmada oo ay ka mid tahay qashinka oo u qabto, bilic xumo deegaanka ah iyo biyihii oo qadhaadh noqday, markii geedkani ku faafay deegaanka.

Sidoo kale dhibaatooyinka uu ku hayay deegaanka waxaa ka mid ahayd xanibaad iyo jid joyn keentay inay adkaato socodka gaadiidka iyo dadka, maadaama oo uu cidhiidhi kadhigay jidadkii.

Natiijada waxqabadkii ololaha geedka garanwaga ee saamaynta ku hayey deegaanka, waxa kamida, in laga tirtiray dhamaanba gudaha magalada. Sidoo kale waxa lagu guulaystay in faafidii badnayd la xakameeyo.

Waxa kaloo bulshada lagu wacyigaliyey in looga faa'iidaysto dhuxulaysi si uu u xaalufo geedka saamaynta ku haya deeganka.





MASHRUUCA CAGAARINTA BOORAMA

Dhirtu waxay ka mid tahay noolaha eebe ku abuuray oogada sare ee dhulka. Waxay qurxisaa oo qaab u yeeshaa deegaanka, waana xikmad rabaani ah oo waxtar noocyo badan ah uleh noolaha si toosa iyo si dadbanba. Waxaa loo adeegsadaa; caafimaad, dhuuni, gabaad, hu', hoy, hadh, difaac, dugsi iyo faa'idooyin badan oo muhiim u ah nololaha aad-amaha.

Iyadoo maamulka degmada Borama tixgalinayo muhiimada dhireynta iyo cagaarinta degmada, waxay hal-abuureen mashruuca CAGAARINTA BORAMA oo ay iska kaashadeen Dawlada Hoose ee degmada Borama iyo hay'adda caalamiga ah ee Save the Children xafiiskeeda Borama. Waxay degmadu aasaastay hirgalisayna xarunta dhir abuurista iyo xanaanaynta ee degmada Borama, taasi oo noqon doonta goob lagu diyaariyo dhirta noocyadeeda kala duwan; dhirta hadhka, quruxda iyo dhirta manaafacaadka quud leh. Waxa ay hadda hoy u tahay xaruntu 5000 geed oo u diyaar ah beeris.

Si loo hirgaliyo mashruuca cagaarinta Borama, waxa ay waaxda arimaha bulshada oo kaashanaysa xarumaha dawlada iyo kuwa amniga ka bilowday dhirbeeris goobaha adeega bulshada laga bixiyo; Goobaha waxbarashada, saldhigyada booliska, wasaaradaha iyo dhamaan goobaha adeegbixinta ee degmada si ay u noqdaan goobo dhireysan oo cagaaran. Bishii November ayaanay hirgashay in la bilaabo mashruuca, iyadoo wajigi koowaad aan u qaybinay geedo gaadhaya 1000 geed goobaha aan kor ku soo xusnay. Sidoo kale waxa si bille ah aan uga hirgelin doonaa mashruuca dhireynta iyo cagaarinta degmada goobaha bulshadu isugu timaad, goobaha danta guud, wadooyinka iyo buuraha magaalada ee dalxiiska ku haboon.

Waxaa kale oo si qorshaysan waaxda Arimaha bulshada dawlada hoose ee Borama u dhiirrigelinaysaa cagaarinta iyo dhiraynta degmada, iyadoo u diyaarisay dhirta noocyadeeda kala duwan si bilaa lacag ah. Waxa bilaaha soo socda u gudbi doona ardayda waxbarata, ciyaartoyga, waalidka, daladaha haweenka, iskaashatooy-

inka iyo lamaanayaasha oo nala cagaarin doona degmada, kuna soo biiri doona mashruuca cagaarinta degmada. Ka degmo ahaan, waxaan ka caawin doonaa xarumaha muhiimka ah, wadooyinka xayndaabka iyo waraabka inta ay dhirtu wad ka bax noqonayso.

Mashruucani waxa uu wax wayn ka tari doonaa; hoos u dhigida biyaha degmada ee dhulka ee soo dha-waaday, waxanu yarayn doonaa caroguurka iyo waxyeelada soo gaadha ciida, Waxyeelada biyaha roobku ku hayaan wadooyinka iyo ka hortaga heer kulka degmada oo wakhtiyadii uu dambeeyey isa soo badalayay. Dadaalka mashruucani waxa uu wax ka tari doonaa ka hortaga iyo la tacaalida isbadalka cimilada iyo wasakhawga hawada ee ay keento dadaalada iyo horumarka bulshooyinku. Waxanu dhiirrigalinayaa iskaa wax uqabsada ay degmada Borama caanka ku tahay, waxana uu soo noolayn doonaa bilicda iyo quruxda dabiiciga ah ee degmada.

Maadaama ay degmada Borama tahay deegaan buuroley ah oo qurux

dabiiciya leh, waxa uu mashruucani degmada usoo jiidi doonaa ilo dhaqaale oo kusoo biira ilihii dhaqaale ee hore u jiray, kadib marka la abuurdo buuro cagaaran, goobo danguud ah oo ku haboon beeraha lagu nasto sida Beerta seeraha ee degmada, iyo dooxyada degmada ku teedsan oo bilicdoodu soo jiidato dalxiisayaasha iyo dadyowga jecel ku nasashada deegaan dabiiciya. Mashruucan waxa uu dhali doonaa mashruucyo is daba socda sida; KU DALXIIS BOORAMA, KU NASO BOORAMA.

Mashruucan cagaarinta waxa ay ka dhigaysa magaalada mid bilicda, qurux, dalxiiska degmada kor u qaada, iyo deganaansho deegaan iyo jawi degsiimo dhamaystiran oo cirka kusii shareerta ku soo hirashadeeda waxbarasho, amni iyo dhaqan ee hore u jiray. Waxaa kale oo degmadu ka adkaandoontaa nuglaanshaha masiibooyinka iyo isbadalka cimilada oo saamayn taban kuyeeshay nololaha bulshooyinka adduunka ee dhaqan dhaqaale siiba dunida dhaqaalaheedu soo korayo oon aan ka mid nahay.

QORAAGA
ILYAAS CABDIRAXMAAN XUSEEN
AGAASIMAHA WAAXDA ARIMAHA BULSHADA D.H EE BOORAMA



LA QABSIGA ISBADALKA CIMILADA

Degmada Saylac, oo ku taal goob u nugul kor u kaca heerka badda, duufaanno xoog leh, iyo isbeddelka heerkulka, ayaa wajahaysa caqabado badan oo ka dhashay isbeddelka cimilada, waxaana ka mid ah nabaad guurka, wax soo saarka beeraha oo yaraday, iyo khataro soo foodsaartay kaabayaasha iyo maciishada.

Mamulku degmadu iyagoo aqoonsanaya caqabadahaas, waxay hirgaliyeen barnaamij kor loogu qaadayo la qabsiga isbadalka cimilada, diyaariyeena qorshayaal wax ku oola oo xoojinaya adkaysiga, la qabsiga dadka, xoolaha iyo deegaanka ee isbadalada cimilada. Barnaamijkan oo la qorsheeyay in uu socdo mudo 5 sano ah oo ka bilaabmaysa 2023 ilaa 2027. Si loo helo qorshayaal taabanaya nolol bulshada iyo deegaanka kana turjamaya saamaynta isbadalka cimilada waxa ay dawladda hoose ee degmada Saylac qaaday tallaabooyin iskugu jira; xog waraysi iyadoo lala kulmay bulshada ku nool deegaanada ay wax yeelaysey isbadalka cimiladu, waraysina lagala yeeshay qaabka iyo nooca saamaynta ay keentay isbadalka cimiladu. Sidoo kale waxa la soo indha indheeyey, lana booqday beeraha iyo dhulka daaqsinta ah, waxaana maamulka dawladda hoose magacaabay dad matala degmooyinka si loola xidhiidho bulshada ku nool deegaamadaas. Ujeedada laga lahaa barnaamijkan oo ahayd in la yareeyo ama laga

hortago khataraha ay keento saamaynta isbadalka cimiladu haday tahay daadadka, duufaana, milicda qorraxda oo aad u kululaatay iyo deegaamada qaarkood oo wakhtiga jiilaalkii aad u qaboobaada. Natiijada laga helay wax qabadkan iyo qorshii 5ta sano ahaa ee la sameeyay, kuna salaysanaa yaraynta iyo ka hortaga isbadalka cimilada, waxaa ka mid ahaa siminaaro iyo tababaro loo qabtay shaqaalaha dawladda hoose iyo bulshada qaybaheeda kala duwan, waxaana la qoday 2 ceel biyood mid laga qoday fiqi aadam iyo mid laga qoday cabdul qaadir degsimooyinkaas oo cimiladoodu aad u kulushahay.

QORAAGA
KHAALID NUUR CALI
AGAASIMAHA WAAXDA QORSHAYNTA D.H EE SAYLAC



DHISMAHA KAABAYAASHA

Dawladda Hoose degmada Oodweyne iyadoo ka duulaysa kor uqaadista kaabayasha dhaqaalaha waxay hirgelisay dhismayaal kala duwan sida Xarunta Dawladda Hoose Ee Degmada oo ah dhisme dhan 2 Dabaq, dhakhtarka weyn, xanaanada hooyada iyo dhalaanka, iyo dugsiyo loo samaynaayo kuraas ay ku fadhiistaan ardaydu si kor loogu qaado adeega waxbarshada iyo caafimaadka ee degmada Oodweyne.

Mashruucan waxa uu ka mid yahay mashaariicihii qorsheysnaa kuwaas oo ku yimi latashiyadii bulshada degmada Oodweyne.

dhismahan dawladda Hoose dhisatay waxa uu wax weyn ka tari doonaa hab sami u socod kii shaqo ee degmada, waxaanu kor u qaadi doonaa bilicda degmada iyo adeega degmada waana dhismse casri ah oo aad loo qalabeeyay si loo helo adeeg dhamaystiran oo dadweynaha gaadha.

Dawladda Hoose degmada Oodweyne waxa ay ka mid tahay degmooyinka ugu danbeeyay ee qaatay mashruuca maamul daadejinta JPLG iyada oo lasoo daadejiyay adeegyada aas aasiga ah ee caafimaadka iyo waxbarshada wallow aan adeega caafimaadka iyo waxbarshada aan si dhamaystiran loogu samayn maamul daadejin.

QORAAGA
MUSTAFE FAARAX CAWIL
AGAASIMAHA WAAXDA QORSHAYNTA IYO HORUMARINTA D.H EE OODWEYNE



MASHRUUCA DHIR BEERISTA

Dawladda Hoose ee degmada Berbera ayaa fulisay mashruuc dhir beerisa oo ujeedkiiso yahay si kor loogu qaado bilicda iyo quruxda magaalada, taasoo lagu beeray 4,300 oo geed bishii novamber, 2023.

Mashruucan dhir beerista oo ka qayb qaadan doona horumarinta bilicda iyo nadiifinta hawada deegaanka.

Xoghayaha fulinta iyo Agaasime waaxeedyada iyo waliba qaybo kamida shaqaale weynaha dawlada hoose ee degmada Berbera ayaa iska kaashaday sidii loo gaadhsiin lahaa dhamaan degmo-xaafadeedyada magaalada Berbera.

DAWLADA HOOSE EE DEGMADA BERBERA



Gobolka Saaxil waxaa uu kaalmaha koowaad kaga jiraa goobaha dalxiiska iyo nasashada loo tago, Xeebta dalxiiska ee batalaale waxay kamid tahay goobaha ugu quruxda badan Somaliland ee ku taala Magaalo xeebeedka Berbera, waana goob ay yimaadaan dal-xiiseyaasha ugu tirada badan ee dal-ka iyo wadamada jaarka, waana goob muhiimad weyn u leh degmada Berbera.

Xeebta batalaale waxa sidoo kale caafimaad ahaan u yimaada dad farabadan oo ka kala yimaada gobolada iyo degmooyinka dal-ka iyo wadamada deriska, halka dhalinyaro badani u yimaadaan dalxiis ahaan, jimicsi iyo caweysyo kala duwan, halkaas oo qaar kamida dhalinyartaasi ku qabsadaan xaflado kala duwan sida dabaal degga meherrada iyo qalinjebinada.

Munaafacaadkaas waxa dhinac taala halis kale oo sababi karta inaad naftaada weydo, inbadan-na sahayatay dad tiro badan sanadihii udanbeeyey, sababtuna ay tahay qarqoonka dabaasha iyo goobaha ka ag-dhow xeebaha oo ay inta badan sababto aqoon la,aan la xidhiidha wakhtiyada cimilada badda oo aanay suural ahayn in lagu dabaasho ama la galo marka ay maayada baddu (ruxanka maw-jadu) kacsan tahay

XEEBTA BATALAALE

ama ay dufaano jiraan gaar ahaan xiliyada xagaaga iyo roobabka oo halista ugu badan lagala kulmo bilaha July, August iyo September oo ay dhacaan bad-xidhinka gacanka cadmeed ama Badda cas.

Hadaba Dawlada hoose ee degmada Berbera iyadoo isha ku haysa faa'iidooyinka guud ee ay xeebta batalaale u leedahay qaranka iyo gaar ahaan degmada Berbera waxa ay dadaalo xoogan ka samaysay horumarinta dhismayaasha xeebta batalaale ee magaalada Berbera sida goobaha nasashada, goobaha jimicsiga sida garoomada kubada cagta, laliska, musqulaha dadweynaha iyo goobaha ganacsiyada.

Waxa kale oo ay dawlada hoose ee degmada Berbera xeebta batalaale ku diyaarisay adeegyada kala ah

1. Adeega gurmada degdega ah 24/7 oo ambalaas la socdo
2. Amniga xeebta Batalaale
3. Iftiiminta xeebta iyo inta u dhaxaysa magaalada iyo xeebta
4. Dhiraynta xeebta batalaale
5. Goobaha dhigashada gaadiidka u gaarka ah
6. Bilicda iyo nadaafada

Hadaba si looga hortago loona yarreeyo dhibaatooyinka nafeed ee ka iman kara qarqoonka bada waxaa dawlada hoose ee degmada Berbera samaysay koox dhalinyaro

ah oo u tababaran kuna xeeldheer dabaasha iyo badbaadinta dadka , kuwaas oo heegan ku ah xeebta batalaale 24 saacba.

Kooxda badbaadada Dawlada hoose ee degmada magaalada Berbera ayaa soo badbaadisay dad gaadhaya 317 qof oo ku qarqoomay badda sanadkan 2023, halka 7 qof ay ku naf waayeen xeebta batalaale kuwaas oo ay da'doodu u dhaxayso 25- 18 jir.

Waxaa kale oo laga sameeyey goobo sheegaya habka loo isticmaalo xeebtaasi , goobaha khatarta ah iyo kuwo dabaasha loogu talagalay , waxaana goob waliba leedahay astaan ama Calan ugaar ah oo kuu tilmaamaya xaalada goobta.

Waxaa sidoo kale jira qorshayaal waawayn oo la doonayo in lagu casriyeyo xeebtaasi oo kamid ah goobaha ugu mudan ee ku yaala xeebaha Somaliland.

QORAAGA
XASAN CABDI CALI
AGAASIMAHA WAAXDA ARIMAHA BULSHADA D.H EE BERBERA





MASHRUUCA LAMBARINTA GURYAHA IYO WADOOYINKA

Mashruuca lambarinta guryaha iyo wadooyinka ee magaaladda Gabiley, nidaamka lambarinta guryaha oo dhamaystiran ayaa waxaa hirgalisay dawladda hoose Gabiley si loo fududeeyo, loona aqoonsado guryaha, meheradaha, iyo wadooyinka gudaha degmada Gabiley.

Mashruucu waxa uu fududayn doonaa adeeg-bixinta bulshada ee biyaha, laydhka, qashin gurka, adeegyada degdega ah ee gaadiidka gurmada caafimaadka, dabdemiska, iyo nabadgalyada. Waxa kale oo uu fududaanayaa nidaamka cashuur qaadista guryaha iyo dhulka bannaan iyo yar-eynta muranka dhulka, mashruucan lambarinta guryaha iyo wadooyinka ayaa la hirgaliyay bilowgii sanadkan 25 august, 2023.

Maamulka dawladda ayaa keenay guud ahaan agabkii lagu dhajin lahaa ama lagu calaamadin lahaa guryaha iyo wadooyinka, agabkan oo ka koobnaa plate number-kii iyo calaamadihii kala duwanaa. Dawladda hoose ee Gabiley oo kaashanaysa shaqaalewaynaha dawladda ayaa samaysay nidaamkan casriga ah ee lambarinta guryaha iyo wadooyinka iyadoo shaqaalewaynahan lagu tabobaray sidii ay guryaha ugu dhajin lahaayeen calaamadaha loogu talagalay si is xigxigta oo macquul ah si ay u sahlanaato isku socodka.

Hiigsiga magaaladda Gabiley oo ah magaalo cagaaran, nadiif ah kuna haboon dalxiiska, si loo gaadho hadafkan

waxaa qayb wayn ka qaatay mashruucan nambarta guryaha iyo wadooyinka si dadka iyo gaadiidka magaaladan cagaaran ee nadiifta ah imanaya ay si sahlan u heli karaan halka ay rabaan iyo dhamaan adeegyada ay ay u baahan yihiin iyagoon u baahnayn cid hagta.

Ugu danbayntii mashruucan lambarinta guryaha iyo wadooyinka ayaa ah mid la jaanqaadaya dunidan casriga ah, si aynu ula jaanqaadno adduunyadda inagoo raacayna habraacyadda caalamiga ah ee adduunyadu u guurtay. Hirgalinta nidaamka nambarta guryaha iyo calaamadaynta magaalada Gabiley waxay u horseedi kartaa kor u qaadida badbaadada, horumarinta adeegyada, kobaca dhaqaalaha, iyo guud ahaan tayada noloshada dadka degan iyo kuwa soo booqdaba.

QORAAGA
HIBO XASAN HAARUUN
AGAASIMAHA WAAXDA QORSHAYNTA D.H EE GABILEY



MAARAYNTA XANUUNKA XUMADDA

Xafiiska maamul daadajinta caafimaadka ee degmada gabiley isagoo ka duulaya dardargalinta iyo baahinta adeegyada caafimaadka ee aasaasiga ah waxay marwalba heegan ugu jiraan sidii ay uga jawaabi lahaayeen baahida caafimaad ee bulshada iyagoo kaashanaya wasaaradda horumarinta caafimaadka.

Sida aynu wada ognahay mudooyinkii u danbeeyay waxa guud ahaan somaliland ka jirtay xanuun ay gudbinayso nooc ka mida kanecada oo loo yaqaan aedes aegypti kanecadaa oo xanbaarta virus ka loo yaqaan arboviruses kaas oo keena xumadda dengue fever. Xanuunkan oo leh calaamado ay ka mid yihiin xumad daran, madax xanuun, murqaha iyo kalagoys-yada



oo qofka xanuuna iyo xaaladaha qaarna keeni kara qofku inuu dhiig soo raaco candhuufta, matagga, saxarada ama in dhiigu ka yimaado sanko.

Ugu horayn wasaaradda horumarinta caafimadku waxay soo dirtay khuburro baadhitaan ku samaysa jiritaanka xumaddan ay gudbinayso nooc ka mida kanecadu. Ugu danbayn gungaadhkii ay soo saareen wasaaraddu waxay ku cadeeyeen inay baadhitaanka ku sameeyeen todoba xarumood halka saddex ka mid ay noqdeen mid laga helay nooca kanecadan gudbinaysa xumadda.

Dawladda hoose iyo wasaaradda caafimaadka oo iskaashanaya ayaa waxay sameeyeen in ay magaalada Gabiley ka bilaabaan buufinta guryaha kaas oo ujeedkiisu yahay sidii loo xakamayn lahaa faafitaanka kanecada. Guud ahaan guryahaya la buufiyay waxay ahaayeen 1,523 guri oo ka koobnaa 6,322 qol, marka laga yimaado tirada

JANUARY 2024

guryaha waxa soo raacayay 36 xarumood oo ay ku jireen iskuulo iyo xarumo caafimaad. Dhinaca kale dawladda hoose iyadoo xoojinaysa la dagaalanka kanecada waxa la sameeyay wacyigalin joogto ah halkaas oo lagu gaadhayo guri guri kaas oo ay ka wada qayb qaadanayeen xarumaha caafimaadka iyo xafiisyada xaafaduhu si loogu dhiiri galiyo bulshada ilaalinta nadaafada iyo degaanka.

Madaama ay kanecadu ku dhalanayso meelaha biyo fadhiisiga, waxay dawladda hoose buuxisay meelaha biyo qabatinka ah ee ku yaala magaalada gudaheega, iyadoo kaashanaysa dadwaynaha waxay bilowday sidii loo dabar jarilaha geedka garanwaaga oo qayb weyn ka qaadanaya taranka kanecada.

Ugu danbayn dhamaan hawlaha kala duwan ee lagaga soo qabtay mudadaa ay socotay dabar goynta kanecadu waxay keentay in si fiican loo xakameeyay faafitaanka kanecada.

Sidoo kale waxaa hoos u dhacday bukaanadii ka caban-



ayay xanuunka xumadda ee booqanayay xarumaha caafimaadka.

Marwalba dawladda hoose ee Gabiley waxay heegan buuxa ugu jirtaa sidii ay uga jawaabi lahayd baahiyaha aasaasiga ee caafimaadka ugana hortagilahayd khataraha.

QORAAGA
MUXIYADIIN MAXAMED QALINLE
MADAXA XAFIISKA CAAFIIMAADKA D.H EE GABILEY





HARGEYSA

Beerta Nasashada
Masala Park

BEERTA NASASHADA DADWEYNAHA

Goobaha nasashada ee magaalada Hargeysa ayaa aad muhiim ugu ah bulshada deggan magaalada, sida daraadeed waxay dawladda hoose ee caasimadda Hargeysi dhistay beerta nasashada carruurta bishii Noofambar 2023. Taasoo waalidiintu ay keenaan carruurta si ay ugu ciyaaraan, laydhsadaan, nastaan iyo in bulshada qaybeheeda kala duwan ay ku kulmaan beer-tan oo si wanaagsan loo naqshadeeyay.

DIBU DHIS IYO DAYACTIRKA BEERTA XORRIYADDA EE MAGAALADA HARGEYSA

Bilawgii bishii diisambar 2023, dawladda hoose ee Hargeysa ayaa dayactir iyo dib u naqshadayn wanaagsan ku samaysay beerta xorriyadda ee caasimada Hargeysa, beer-tan oo ah meel dadku isugu yimaadaan ayaa wax weyn katari doonta baahidii ay dadka reer Hargeysa uqabeen goobo nasasho oo ku haboon isu imaatinka bulshada wakhtiyada firaaqada, waxa kale oo ay wax ka taridoontaa dadka xiiseeya lugta kana faa'iidaya goobtan.

BEERTA NASASHADA EE DAAMI (DAAMI PUBLIC PARK)

Dhaamkii daami waxaanu u qorshaynay inuu noqdo goob nasasho ama dalxiis oo ay iman karaan cirroole iyo carruurba. Goobtani waxay noqon doontaa goobtii ugu horeysay ee caasimadda Hargaysa laga hirgeliyo ee ugu baaxadda wayn ee abid laga yagleelo geyiga Somaliland.

Goobtan dalxiisku waxay ka koobnaan doontaa degel la mid ah goobaha nasashada caalamiga ah oo kale oo ay u dhamaystiran yihiin qaybihii kala duwanaa ee loogu talagalay. Waxaanu ka mid noqon doonaa mashaariicda ay fuliyeen golaha deegaanka ee uu gadhwadeenada ka yihiin mayar Mooge, maayar ku xigeenka Khadar iyo xoghaye Siciid, sidaas ayaanay taariikhda ugu gashay beerta nasashada caasimada Hargaysa.

QORAAGA

KHADAR YUUSUF CALI
AGAASIMAHA WAAXDA QORSHAYNTA D.H EE HARGEYSA



RB
RIDWAAN
BURAALE

MASHRUUCA MAARAYNTA KHATARTA DHAAMKA DAAMI IYO BADBAADINTA 150 QOYS

Mashaariicda caalamiga ah ee uu utartamay xafiiska drm/mkm ee D.H Hargeysa

Xafiiska maaraynta khataraha iyo masiibooyinka ayaa sanadkii 2022 ku tartamay mashruuc ay soo xayaysiiyeen ururka ama golaha isku socodka maayarada adduunka, mashruucu waxa uu kamid ahaa mashaariicda loogu tallogalay in gacan laga siiyo dadyowga ay saamaysay noloshooda isbedelka cimiladu, qadarka lacagtuna waxa uu dhannaa \$200.000.

Xafiisku waxa uu guul lama filaan ah kasoo hooyay tartankaas oo ay ku tartameen 18 caasimadood oo afrikaan ah oo ay sidaas kaga mid noqotay 6-dii caasimadood ee lagaga dhawaaqay guushooda shirwaynahii caalamiga ahaa ee cimilada adduunka cop 28 ee kadhacay magaalada sharma-alsheik, caasimaduhuna waxay kala ahaayeen; (Hargeisa, Nairobi, Casablanca, Nyemagabe, Dar es salam, iyo Ethekeeni).

Hadaba caasimada Hargeysa waxay tartankan caalamiga ah kaga qaybgashay mashruuc 100 qoys lagaga rarayo dhaamka daami ee degmada Gacan Libaax oo ay biyaha dhaamku kuhayeen khatar nafeed iyo mid caafimaadba oo labadan sanadood ee u dambeeyay ay ku dhinteen 3 qof.

Ujeeda mashruucani wuxu ahaa in laga raro oo la dajiyo goob nabad galyo ah oo ay nololashu ka suurtagalayso oo leh dhamaan baahiyihii aasaasiga ahaa, sidoo kalana la siiyo dhul ay leeyihiin loona sharciyeeyo.

Dhaamka daami ayaa halis ku hayey qoysaska la jaarka ah, waxaanu liqay dhalinyaro ku dabaalanaysay, sidoo kale waxa jirtay mar uu jabay oo uu khatar galiyey gu-

ryihii u dhowaa, waxaanu madaxweynuhu ka soo saaray awaamiir dadka lagaga rarayo. Xaaladahaasi markay soo noqnoqdeen dhawr goor ayuu duqa caasimada Hargeysa mudane Mooge isaguna amar ku bixiyay in laga raro dadkan oo degdeg tirokoob rasmiya loogu soo sameeyo.

Mashruucani waxa uu toos u bilaabmay 1st february, 2023, waxana uu soo afmeermayaa 31st january, 2024, mashruucan waxa ka faaiidaysanaya 100 qoys oo qoys walba la siinayo muddo 8 bilood ah qoyskiiba \$100 oo loogu talagalay inay biishadaan intay la qabsanayaan noloshan cusub. Waxa kale oo 20 dumar ah la siin doonaa qofkiiba \$1000, halka 28 dhalinyaro ah la gudoonsiin doono 17 motor cycle iyo 11 tricycle. Ujeedka loo siinayo qalabkan iyo qadarkan lacagta ahi waxa weeyi in shaqo abuuris loogu sameeyo dhalinyaradan iyo haweenka, si ay ugu shaqaystaan oo ugu dabaraan noloshooda. Dhinaca kale waxa lasiinayaa tobabaro farsamada gacanta ah dhalinyar, gabdho iyo wiilal iskugu jira, si ay iyaguna ugu shaqataan xirfadahan, nasiib wanaag kooxdii ugu horaysayna waxa ay hadda ka qalinjabiyeen barashada farsamada makiinadaha bunka iyo shaaha lagu sameeyo, keega iyo macmacaanka, muda-



labka hudheelada casriga ah. Mashruucani waxa uu ka mid noqday mashaariicdii ugu horeysay ee laga hirgeliyo caasimada iyo guud ahaan wadanka Somaliland, waxa kale oo uu kow ka noqday dib u dejin la sameeyay kii ugu heerka sareeyay.

Sababtuna waxa weeyaan bulshadan waxa la siinayaa xubno ka mid (dameer qadiyeyaal, mootooyin, dawaa-ro iyo lacago ay ku shaqaystaan, iyo sidoo kale lacag ay quutaan muddo 9-bilooda, waxa kale oo qoys walba la siinayaa bustayaal, weel iyo tawaangida biyaha oo calaa qoys ah iyo 3 taangi biyood oo waawayn oo meelo sare la saaro si biyaha ay uga dhaansadaan.

Xafiiska drm/mkm, wuxuu ku guulaystay inuu ka raro boqol iyo konton qoys oo dul deganaa dhaamka daami, waxaana 100 qoys oo kamid ah looga yagleelay xaafad cusub oo loo bixiyay cabdi bidaar village ee degmada a.M.Haarun, 50-ka qoysna waxa la dejiyay degsiimadii hore ee jimcaale C ee isla degmadaas. Qoysaskani waxay halis ugu jireen sadex dhibaato oo nafahooga ama noloshoodaba khatar ku hayey sida dhaamka oo kusoo fatahi jiray, kaneeco, ur, dhimasho iyo nadaafad daro.

Daraasad iyo tirokoob kabacdi ay samaysay dawladda

hoose waxay u qorshaysay in la dejiyo goobo magaalada gudaheega ah oo leh dhamaan adeegyadii aasaasiga ahaa dhaamkan khatarta ku ah ee ay dul degen yihiina uga badbaado badan uguna caafimaad fiican goobihii ay markii hore ku noolaayeen, sidoo kale waxa la siiyey dhul ay iyagu leeyihiin oo loo sharciyeey, maadaama oo ay goobtan ay degenaayeen ay u dhawaayeen dhamaan baahiyaha aasaasiga ah.

Faa'iidada ay heleen dadkan lararay waxa kamid ah in loo dhiso jingado kuwii jingadaha gallayey, halka kuwii buulasha galayeyna loo sameeyey buulal ka cusub kuwii ay markii hore ku jireen, taas oo lacago badan kaga baxday dawladda hoose ee hargeysa.



XAYNDAABKA DHAAMKA DAAMI

14th August, 2023 maalinkaanu bilownay rarka qoysaskan kadib waxaanu naadin ku samaynay qandaraas silig lagu xayndaabi doono dhaamka iyo nawaaxigiisa. Muddo kooban ayey shirkadii ku guulaysatay ku xidhay taarkii lagu soo wareejinayey dhaamka. Dhaamkii daami khatarta nafeed iyo midda caafimaad daraba ku hayay dadkii hareerihisa deganaa waa degel xidhan oo nabadgalyo ah oo la ilaalinayo.



QORAAGA CALI MAXAMED NUUR AGAASIMAHA WAAXDA MAARAYNTA KHATARAHA IYO MASIIBOYINKA EE D.H EE HARGEYSA

TODDOBAADKA OLOLAHA NADAFADA MAGAALADA

Dawladda Hoose ee degmada Burco ayaa fulisay olole lugu nadiifinayo magaalada Burco, iyadoo kor loogu qaadayo nadaafada iyo bilicda magaalada. Ololahan oo socday mudo toddobaad ah ayaa bilaabmay khamiistii bishii december 28, 2023.

Maamulka dawladda hoose oo garab ka helaya bulshadooda iyo ciidanka qaranka ayaa si habsami leh u fuliyay ololahan.

DAWLADA HOOSE EE DEGMADA BURCO



DIB U HESHISIINTA BEELAHA WAALALAHA AH

“KA QAYB QAADASHADA TUBTA NABADDA COLAADDA CEEL-AFWEYN”

Degmada Ceel-afweyn waa degmo hodon ku ah xoolaha iyo dhul daaqsiimeed oo dadkeedu wadaagan kheyraadka kala duwan ee deegaanku leeyahay sida cawska, biyaha, iwm.

Degmada waxa mudooyinkii uu danbeeyay ka dhacayay colaaddo sokeeye, kuwaasi oo dhex maray dadka walaalaha ah ee wada degan deegaanada Ceel-afweyn.

Golaha deegaanka ee degmada Ceel-afweyn markii colaadan sokeeye ee ugu danbaysay soo food saartay, Soona laba kaclaysay waxay galeen shirar muhiima oo ku aadan joojinta dhiiga dadka walaalaha ah.

Colaadan waxay Golaha degaanka ku keentay culaysyo badan oo saamaysay guud ahaan adeegyadii aasaasiga ahaa ee ay u qaban jireen bulshada, madaama ay noqotay mudnaanta koobaad xallinta colaada.

Waxa kale oo maamulka degmadu qaabilay intuu ku jiray hawlgalkan ergooyinkii ugu badnaa ee nabadeynta oo isugu jiray golayaasha xu

CEEL-AFWEYN

kumada, madaxda dhaqanka iyo cid kasta oo dhawaaqa colaadu soo kicisay, kadib dhawr maalmood oo dhiiladu taagnayd waxaa lagu guulaystay xabad joojin, xaajo qaadis iyo in xil weyn layska saaro inaan dhiig danbe daadan, taas oo si habsami leh ilaa hadda ay u socdaan dedaalada nabadeyntu.

Degmada Ceel-afweyn oo ka soo daga-rogtay colaadda sokeeye una soo ifbaxday ifafaale rajo leh ayaa marag u ah wada-hadalka, dib-u-heshiisiinta iyo hindisaha ay bulshadu waddo. Iyadoo mudnaanta la siinayo dhisidda kalsoonida, qaadashada runta iyo dib-u-heshiisiinta, maalgelinta horumarinta, iyo kobcinta iskaashiga bulshada, degmadu waxay muuji-

say in xalinta dagaalada sokeeye ay suurtagal tahay marka lagu jiro xaaladaha adag.

Sheekada Ceel-Afweyn waxay u noqonaysaa dhiirigelin iyo dariiq toosan bulshooyinka iyo ummadaha kale ee la tacaalaya saamaynta ay leedahay colaadaha sokeeye. Waxay muujinaysaa muhiimada geedi socod loo wada dhan yahay kaas oo ay ka mid tahay ka qaybqaadashada dib u heshiisiinta, iyo awooda wax ka bedelka colaadaha soo noqnoqda.

Ugu danbayn golaha degaanka Ceel-afweyn waxaa ka go’an Soo celinta wada dhalashada walaalnimada iyo wax isu ahaanshaha dadka deegaanka degmada Ceel-afweyn oo ah dhaleeyo aanay dhiilo dhex mari Karin taasoo dhabbaha u xadhaysa mustaqbal ifaya oo is afgarad iyo is-waafaqsanaan ku dhisan.

**QORAAGA
MAXAMUUD CABDI BARRE
AGAASIMAHA WAAXDA QORSHAYNTA D.H EE
CEEL-AFWEYN**

LA DAGAALANKA DEEGAAMEYSIGA IYO ILAALINTA DHUL-DAAQSIMEEDKA

Dawladda Hoose Ee Degmada Laas-Qorey oo ka hawl gashay xalinta khilaafaadka ka dhasha deegaamaysiga iyo ilaalinta dhulka hantida guud.

Dawladda Hoose ee degmada laas-qorey ayaa fulisay hawl-gal lagaga hortagayo deegaamaysiga, iyadoo dadka laga wacyigelinayo in aanay wanaagsanayn in dhulka la deegaamaysto meelaha aan loogu talo-galin, isla markaana aan munaasib ku ahayn in la magaleeyo sida dhul daaqsimeedka. Meelaha ay mamulku ka hawl-galan waxaa kamid ah degaanada; shiine madoow, xaragle iyo dabra.

Hawl-galkan oo qabsoomey bishii 8aad ee sanadkan 2023, markii la arkay in khilaf badani ka dhashay bulshada dhexdeeda meelo badan oo deegaanka ka mid ah, waxaa maamulka degmada laas-qoray ka hawl galeen sidii looga hortagi lahaa deegaamaysiga waxaanay u dajiyeen qorshe wacyi galineed isla markaana lagu soo kormeerayo deegaanka lana qabto maalin kasta oo axad ah usbuuc walba inta la dabargoynayo deegaameysiga.

Ujeedada hawl-galkan laga lahaa waa in la dabargooyo deegaameysiga isla markaana la ilaaliyo dhul daaqsimeedkii reer guuraaga, taas oo ka hortagaysa in dhul aan ku habooneyn deegaamaysi laga dhigo magaalo, kana dhalato khilaafaad dhinaca bulshada ah. Dadka oo isku qabsada cida meesha dageysa iyo sida loo dagaayo, ayaa horseeda in muranku bato, iyada oo dadkii reer guuraaga ee caws-wadaagta ahaa aaney ku hashiineyn kuna coloobaan.

Natiijada hawl-galkaas ka soo baxdey waxa weeye in si isku mid ah dadka looga wacyi gashey oo looga hortagey iyadoo dhamaan dadka reer guuraaga ay soo dhaweeyeen, loona sameeyay gudiyo sida ay iskugu dhow yihiin laguna wargeliyey in ay si isku mid ah uga hortagaan dabargoyn-ta deegaameysiga, ilaashadaana dhul daaqsimeedka.

QORAAGA
CARAFaad MAXAMED DIIRIYE
AGAASIMAAHA WAAXDA QORSHAYNTA D.H EE LAAS-QOREY



HORMARINTA BILICDA MAGAALADA GAR ADAG

Iyadoo laga duulayo waajibaadka kasaaran dawladda hoose inay ka shaqayso bilicda iyo dhiraynta waxay taaba galisay inay dardargaliso hawlaha shaqo taas oo ay wax badan ka qabatay Kuna soo kordhisay degmada Gar-adag.

Waxay dawladda hoose ee degmada garadag ay samaysay goolado ay ka hirgalisay labada dhinac ee laga soo galo degmada ee galbeedka iyo bari-ga laba gooladood oo ay ku beertay

dhir si ay bilic ugu soo kordhiyaan degmada.

Dhamaan waxaa hawlahaas fulisay dawlada hoose ee degmada Gar-adag iyadoo ka faa idaysanaysa kabka ay ka hesho dawlada dhexe iyo cashuuraha kasoo gala degmada.

Waxaa markasta noo qorshaysan hadaanu nahay maamulka uu gadhwadeenka ka yahay gudiimiyaha degmada Gar-adag Cabdulaa-

hi Saleeban Boobe in ay degmada bilicdeeda iyo dhiraynteedaba kor u qaadno kana tagidoono degmo horumaratay oo bilicsan markastana heegan ugu jirno sidii loo arki lahaa Gar-adag qurux badan.

QORAAGA
CABDIRAHMAN DAAHIR YUSUF
AGAASIMAAHA WAAXDA QORSHAYNTA D.H EE GAR-ADAG



LA DAGAALANKA IYO DABAR GOYNTA GEEDKA GARAN-WAAGA

Sidaynu wada ogsoonahay waxa jirta in geedka garan-waaga ahi uu deegaanka si xawli ah ugu fidayo sanadba sanadka ka dambaysa, isagoo qabsaday dhamaan hareeraha magaalooyinka kuna sii fidaya meelkasta.

Waxaanu ka baxay wadooyinkii, dhulkii danta guud ahaa iyo dhulkii gaarka loo lahaa. Waxaynu ognahay inaanu geedkani wax faa'iido ah lahayn dhibaato mooyaane sida qodax halisa, iyo kanecada oo ku dhumata, biyaha oo uu u qabto iyo foolxumo deegaanka ah. Sidaa daraadeedna waxa lagama maarmaan ah in wax laga qabto isla markaana aynu xakamayno intaanu si buuxda inoogu fidin xalna aynaan uwaayin.

Hadaba sida kaliya ee aynu ku xakamayn karnaa waa inaan la kaashanaa bulshada inagoo maamul ahaana ku-



hagayna qorshaha lagu xakamaynayo. Sidoo kale waa inaynu dawlad hoose ahaan galinaa wakhti badan iyo dhaqaale wixii hadba inoo suurto gal noqda (sida kharashka miisaaniyadda lamafilaanka ah) waxaana xusid mudan in dhulka uu ka baxay 70% uu yahay dhulkii

dadka halka 30% ka kalana uu yahay dhulkii danta guud sida wadooyinka. Sidaa darteed maalmulka degmada sallaxley waxa ay sameeyeen qorshayaal wax lagaga qabanayo.



WACYGAILINTA BULSHADA

1. Bulshada ayey u sameeyeen wacyigalin buuxda oo 2 cisho ah ka hor hawgalka .
2. Waxayna si gaara ula kulmeen guddiyada, ururada bulshada iyo laamaha kale duwan ee dawladda si ay uga gayb qaatan hawgalka.
3. Dadka ayaa si guud iyo si gaar gaar ahba loo wacyigaliyey si ay uga qeyb qaataan shaqada isla markaana lagu wacyigaliyey inay maalinta hawlgalka weyn



ay soo xidhaan dhamaan meheraddaha saacad iyo badhka lashaqeynayo.

4. Sidoo kale waxay soo dhaweeyeen waxkasta oo macquula oo ay dadku kusoo kordhiyeen qorshe ahaan hadii loo baahdo.

SHAXDA HAWLGALKA QORSHAHA

1. Hawlgalkani waxa uu soconayaa muddo 10 maalmood ah
2. Shaqada waxa ka qeyb qaadanaya shaqaalaha d/hoose, iyo bulshada iyagoo adeegsanaya gaadiidka dawladda hoose.
3. Waxa kale oo iyaguna si gaara uga shaqeyn doona shaqaale si gaara loogu xilsaaray dabargoynta geedkan.

Fiiro gaara: mudanayaal hadii aynu fulino shaqadan waxay inoo leedahay dawlad hoose ahaan faa'iidooyinkan hoos ku xusan;-

1. Waxay d/hoose iyo bulshadaba u tahay waxqabad weyn oo dhinaca deegaanka ah.
2. Waxay wax weyn ka taraysaa arintii dardargalinta cashuurta dhulka oo aynu si fiican ugu dhaqaajin karo waxqabad ahaan.
3. Waxay kaalin mugle ka qaadanaysaa inaan xakamayno saameynta geedkan.

Allahmahadleh

QORAAGA
KHADAR GAAS CUMAR
AGAASIMAHA WAAXDA ARIMAHA BULSHADA D.H EE SALLAXLEY





SAAMAYNTA WADDO XUMADU AY KU LEEDAHAY DHAQAALAHA DEGMADA

Dawladda hoose degmada Baki ayaa fulisay iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda shaqo waddooyin dhexmara magaalada, kuwo ka baxa iyo kuwo soo galaaba, kuwaas oo fududaynaya isku socodka degmada. Maadaama ay baki ku taalo dooxyo, waxa markasta oo roob da'o waxyeelo soo gaadhaa waddooyinka magaalada waxaana xidhma isu-socodka dadka iyo gaadiidka.

Hawshani waxa si toos ah loo qabtay bishii 4aad ee sanadkan 2023, si khataraaasi looga hortago ayay dawladda hoose sameysay seddex waddo oo kala ah; waddo dhexmarta magaaladda dhexdeeda oo ah 1km , waddo isku xidha magaaladda iyo beeraha oo ah 2km iyo waddo magaaladda uga baxda koonfurta iskuna xidha magaaladda Baki iyo waddada Boorama oo ah 2.6km. Iyadoo la raacayo nidaamyada iyo habraacyada ay wax u qabato dawladda hoose waxa sameeyay waddooyinkaas shirkad lasiiyay qandaraaska dawladda hoose ay ku daba-jooqday , Kuna kormeeraysay shaqadaasi.

Madaama oo ay Baki tahay degmo wax-soosaar oo dhaqaalaheedu ku xidhan yahay khudaarta kasoo go'da beeraha, waxa khatar dhibaato ku haya dooxyada xiliyadda roobabka oo ay waddooyinka burburaan ama ay xidhmaan taasoo keenta in khudaartu ku dhimato beeraha oo khasaare weyni gaadho beeralayda iyo bulshadaba, sidoo kalena isku socodka gadiidka oo meesha ka baxa mudo bil ama laba bilood ah iyadoo daadadku qaadaan gaadiidka oo hanti badani ku burburto, arrinkani maaha mid khatar kaliya kuhaya waddooyinka balse waxa ay dib u dhac dhaqaale ku keentaa beeralayda iyo bulshada.

Sidoo kale go'doominta ay sababeen daadadka jaray waddooyinka ayaa caqabad ku ah isu socodka magaalooyinka iyo horumarka guud ee degmada.

Natiijada laga gaadhay sameynta waddooyinka waxa ka mid ah waxay ka qayb-qaateen ganacsigii iyo horumarka magaalada, waxa meesha ka baxay xanibaadii isu-socodka xiliyada roobka ee dadka iyo gaadiidka, waxa kor u kacsameeyay ganacsigii magaalada, waxa yaraaday khatarihii ay keeni jireen waddo-xumadu waxana fududaadey isu-socodkii waddooyinku waa halbowlaha iyo horumarka degmooyinka.

QORAAGA
CABDIRAXMAN CABDILAHI YAY
AGAASIMAHA WAAXDA QORSHAYNTA D.H BAKI



FAYADHAWRKA QASHINKA

Dawladda hoose ee degmada Balligubadle waxay ka mid tahay Degmooyinka la tacaalaya maareynta iyo ka hortaga khatarta caafimaad ee qashinka.

Qashinkaas oo isugu jiraa adke iyo dareere, wuxuuna inta badan kayimaada guryaha, suuqyada, xafiisyada, xarumaha caafimaadka, goobaha waxbarashada, mashaariicaha dhismayaasha iyo beeraha.

Celcelis ahaan xaddiga qashinka kasoo baxa degmada Balligubadle waxa lagu qiyaasaa bishii in ka badan 500 gaadhi (oo u dhiganta 2,500,000 kg ama 2,500 m-tan) oo qashin adke ah iyo ilaa 20,000 litir ama 4,000m3 oo qashin dareere ah. Guud ahaan qashinkaasi 65% wuxuu kasoo baxaa magaalada Balligubadle, halka 35% kalena uu kasoo baxo degsiimooyinka kale ee hoos yimaada degmada. Waxa xusid mudan in dawladda hoose degmada Balligubadle ay bishiiba ka qaado ama maareyso qashin xaddigiisu yahay 90 gaadhi oo u dhiganta 45 tan qashin adke ah magaalada Balligubadle gudaheeda, iyadoon adeegan wax lacaga kaga qaadin dadweynaha. Halka wax qashin dareere ah oo laga qaado guud ahaan degmada Balligubadle aanay jirin.

Dhanka kale, labadii sano ee u dambeeyey waxa muuqata in degmada Balligubadle ay culaysyo iyo caqabado kala duwani ka haystaan dhanka maamulka iyo maareynta qashinka haday tahay xagga awooda iyo nidaamyada ururinta, qaadista iyo baabiinta qashinka.

Waxaana kamida caqabadahaasi heerka wacyiga bulshada ee dhanka waxyeelada qashinka oo hooseeya, kaabayaasha maareynta qashinka oo aad u yar ama aan jirinba iyo shaqaalaha nadaafada oo aan ku filnayn, goobaha qashin-qubka ee jiraana waa kuwo furan oo aan lahayn wax deyra ama xayndaaba. Sidoo kale, awooda dhaqaale ee degmada oo hooseysa isla markaana aan awoodi karayn inay daboolo guud ahaan hawlaha maareynta qashinka, iyadoo ay ka sii darayso markasta oo dadweynaha degmadu ay sii kordhaan.

Si kasta ha noqotee, caqabadahani waxay keeneen oo ay fudeydiyeen in qashin fara badan oo lagu daadiyey meelo aan ku haboonayn uu ku nagaado magaalooyinka dhexdeedo, sida waddooyinka iyo biyo mareenada. Waxa kale oo uu qashinki ku fiday goobaha biyaha, beeraha, keymaha iyo dhul-daaqsimeedka, waxaana kashay qashinkaasi bilic-xumo iyo khataro caafimaad daro sida cudurrada faafa, xoolaha oo ku dhinta markay cunaan iyo waxyeelo dhirta iyo khayraadka dabiiciga ah soo gaadha.

Sida ku cad warbixinada xarumaha caafimaadka degmada Baligubadle waxa aad u sarreysa heerka saameynta cudurrada faafa ee ka dhashay nadaafad-xumada iyo wasakhawga biyaha sida shuban-biyoodka, joonis-caska, tayfoodhka, gaastariga, malariyadda iyo xumada-kanecada. Sanadkii 2022 tirada dadka ay saameeyeen ama usoo dhacay cudurradaasi waxay ahaayeen 3,600 qof. Waxayna dadkaasi isugu jireen 1,440 carruur da,doodu tahay (0 - 16 sanno), 1,008 haween (20 - 45 sanno), 864 dhallinyaro (18 - 30 sanno) iyo 288 dad waaweyna.

Sidaasi darteed, waxa lagama maarmaan ah in la abuurto habab ku haboon oo lagu maareeyo noocyada qashinka haday tahay nidaamka ururinta iyo qaadista iyadoo la adeegsanayo qalab ku haboon kala saarista qashinka (adke & dareere), iyo geynta goobaha ku haboon kadibna lagu baabiyo ama lagu aaso. Waxa kale oo ay degmadu u baahan tahay inay yeelato gaadiidka daboolan ee qashinka qaada, in loo tababaro shaqaalaha nadaafada iyo in lasameeyo goobo qashin-qub oo ku filan guud ahaan qashinka ka soo baxa degmada Balligubadle.

QORAAGA
KHADAR XASAN CABDI,
AGAASIMAHA WAAXDA QORSHAYNTA D.H BALLIGUBADLE



Caynaba
CAYNABA

DHAHAR

DABAR-GOYNTA XALUFINTA DEEGAANKA

Dawladda Hoose Ee Degmada Dhahar iyo Bulshadadeeda oo iska kaashaday sidii loo dabar-goyn lahaa ka ganacsiga dhuxusha iyo isticmaalkeedaba

DAAD GURAYNTA DADKA IYO SAAMEYNTA DAGAALADA

Dawladda Hoose degmada Caynabo ayaa u fidisay gar-gaar lagu taageerayo dadka deegaanka ee ay saameeyeen dagaalada ka bilaabmay gobolka Sool taasoo ay wax yeelo weyn ka soo gaadhay bulshada.

Maamulka degmada waxay u fidiyeen gar-gaarka deg dega oo iskugu jira dhar iyo hu dhaawacyadii la keenay cusbitaalka guud ee Caynaba, sidoo kalena waxay gaadhsiiyeen biyo iyo cunto dadka ka soo barakacay goobaha dagaalku ka socdo.

Gurmadkan waxa la fadiyay intii

u dhaxaysay bilihii 8aad ilaa 9aad iyadoo lala kaashaanayo qaybaha ay khusayso sida waaxda gurmadka deg-dega ah ee wasaaradda caafimaadka, iyo golaha deegaanka oo iskaashanaya ayaa heegan ugu jiray gaadhsiinta gaadiidka ambalaaska goobaha colaaduhu ka jireen.

Dhaawaca marka la keeno cusbitaalka si loo yareeyo heerka dhimashada waxaanu daryeel u samaynay dhamaan dhaawacyadii goobaha dagaalka laga keenay.

Sidoo kale waxaanu gar-gaar u fidinay qoysaska ay saamaysay colaadu

oo la gaadhsiiyey baahiyaha aas aasiga ah.

Iyadoo weli ay socdaan dagaalada sokeeye misna waxa la gaadhay heer uu dadka dhaawacan helaan baahiyaha asaasiga ah sida daawada, dhar-ka iyo cuntada.

QORAAGA
KHADAR IBRAAHIM CALI
AGAASIMAHA WAAXDA QORSHAYNTA D.H EE CAYNABA

Dawladda Hoose ee degmada dhahar oo kaashanaysa dadka deegaanka ayaa fulisay hawl-gal ay kaga hortagayso dhibaataada iyo saamaynta ay deegaanka ku hayso xaalufinta dhuxushu. Hawlgalkan oo uu ujeedkiisu ahaa ka hortaga xaalufinta deegaanka iyo siddii kor loogu qaadi lahaa bilicda deegaanka. Hawlgankan wuxuu soo socday muddo 10 sanno ah. Dawladda hoose ee degmada Dhahar waxay iyadda oo garab ka helaya dadka deegaanka qabsomay bishii kowaad sanadka 2022.

Dadka deegaanka oo ugu horeeyaan waxgaradka, odayaasha, aqoonyahanka, haweenka iyo qurba-jooqta oo garab ka helaya dawladda hoose ee degmada Dhahar waxa ay si bille ah u qaadan wacyi-gelin iyo hawl-gal loogu baaqayo ka qayb-qaadashada ololaha lagu tirtirayo saamaynta xaalufinta deegaanka.

Dhibaatooyinka xaalufinta deegaanka/dhuxushu ku hayso bulshada waxa ka mid ah in la waayey dhirtii dadku harsanayeen iyo dhirtii xooluhu daaqayeen.

Waxa kale oo ka mid ah in deegaankii noqday lama degaan aanan xoolihii la daaqsan karin, sidoo kale deegaankii intii laga shiday dhuxusha waxay noqotay meel billic-xun.

Dheefta laga qaadan karo waxqabadkii ololaha ka hortaga xaalufinta deegaanka/dhuxusha ee saamaynta taban ku



hayey deegaanka ee la tilmaami karo waxa ka mid ah in meelkasta ee geed laga jaray laga beeray geed ama si dabiici ah uga soo baxay geed. Sidoo kale waxa laga faa'iiday in bulshada kor loo qaado wacyigeeda, wada-shaqayneed iyo isku tiirsanaanta bulshadda iyo in qofkasta ka qayb qaadan karo xal u helida dhibaataada dhuxushu ku leedahay deegaanka.

QORAAGA
ENG. JAAMAC DAAHIR SICIID
AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA IYO MAALIYADDA
AHNA AGAASIMAHA WAAXDA QORSHAYN D.H DHAHAR



HORUMARINTA ADEEGA WAXBARASHADA

Mayorka degmada Sheekh Eng Ismaaciil Xuseen Cali iyo gudomiyaha wasaarada waxbarshada degmada Sheekh Maxamed Ibraahin X.Cabdilaahi oo ay weheliyaan xildhibaano golaha deegaanka degmada Sheekh ayaa 31 bishii october 30 caruura geeyay dugsiyada waxbarashada degmada Sheekh si ay u helaan waxbarshada aasaasiga ah.

Ugu dambayn waxa uu mayorka deg Sheekh iyo gudomiyaha wasaarada waxbarshadu ku wareejiyeen agabkii loogu talagalay ardayda maamulaha dugsiga hoose dhexe ee Muuse Macaleesh mudane Ibrahin Xaashi.

Alxmdulaah waxa maanta jahligii ka bixi doona 30 caruura oo ka mid noqon doona jilil ku hubaysan aqoon oo anfac qaranka iyo nafahooda insha allah.

DAWLADA HOOSE EE DEGMADA SHEEKH

Ubadkan oo ka mida 380 caruura oo ay dawladda hoose ee degmada Sheekh iyo wasaarada waxbarashada heer gobol iyo heer degmo iska kaashanayaan si ay u helaan waxbarsho ayaa la gaadhsiiyay agabkii waxbarsho ee ay u baahnayeen, agabkan oo isugu jira buugaag, qalimaan iyo shandado.



BEERTA NASASHADA IYO FAGAARAHA KHAYRIYADA

Degmada Sheekh waa dhul u badan buuraley hessa roobab wanaagsan sanadkii. Waxa ku yaala dhinaca waqooyi ee magaalada dhul leh ciida carrada ee ay ku badan tahay milixdu oo loo isticmaali jiray in xoolaha looga guro carrada.

Dhulkan carrada ah oo aan laga dhisin inta badan dhismayaasha, maadama oo ay ciideedu furantahay dhismuhuna si sahal ah u dilaaco kana samaysmeen jeexjeexyo iyo boholo ayay golaha deegaanka degmada Sheekh u aqoonsadeen dhul danguud ah kalfadhigii 5aad ee golaha deegaanka degmada Sheekh.

Dhulkan oo ay dawladda hoose ee degmada Sheekh ugu talo gashay inay ka samayso fagaaraha khayriyada degmada iyo beer nasasho ayaa bilawgii shaqada waxa ay dawladda hoose kala kulantay caqabad dad sheeganayay goobta iyadoo uu maamulka dawladda hoose ee degmada Sheekh galiyay tacab badan sidii loo xalin lahaa, aakhirkiina ay ku guulaystay dawladda hoose inay ku qanciso dadkii in laga dhigayo goob danguud ah oo waxtar u leh bulshada iyo degmadaba.

Cabirka beertan oo ah 1.8km2 waxay dawladda hoose ku bilawday inay isku sinto dhulka oo lahaa jeex jeexyo biyuhu gooyeen iyo dhul kala sareeya, iyadoo galisay cagafyada daw-

ladda hoose iyo kuwa dadweynaha, waxaana loo sameeyay shaqaale u gaara isla markaana waxa ku socota dhirayntii oo wajigii kowaad lagu beeray 350 geed oo ah nooca ku baxa ciida dhanaan.

Beerta nasashada ee Sheekh oo noqon doonta goob badbaadisa caro guurkii ku socday kana qayb qaadan doonta dadaalada badbaadada deegaanka. Sidoo kale waxa qorshaha fog ee maamulka degmada Sheekh ka mida in lagu beero ilaa 30 nooc oo dhirta ku baxda carradan iyo in mustaqbilka

la keeno xayaawaanada duur joogta ah, dadkuna ay ka helaan goobo ay ku nastaan kuna qaataan wakhtiyada fasaxyada ah.

Sida ay rajaynayaan maamulka dawladda hoose goobtan waxay ka qayb qaadan doontaa bilicda magaalada Sheekh iyo ka hortaga xaalufka deegaanka.

QORAAGA
MAXAMUUD JIBRIIL YUUSUF
AGAASIMAHA WAAXDA ARIMAHA BULSHADA D.H EE SHEEKH





WARBIXINTA WAXQABADKA URURKA DAWLADHA HOOSE EE ALGASL 2023



Uururka Dawladaha Hoose ee Somaliland (ALGASL) isaga oo gudanaya Waajibaadkiisa shaqo oo ay ugu mudan yihiin in laga caawiyo degmooyinka sidii ay kor ugu qaadi lahaayeen awoodooda adeegbixinta Bulshada, kobcinta dhaqaalaha aasaasiga ah, wada shaqayn togan oo dhex mara degmooyinka, iyo in ay xidhiidh saaxiibtinimo iyo mid wax ku ool ah la yeeshaan dawladda dhexe ee Somaliland iyo Hayaadaha Caalamiga ahba ayaa ururku waxa uu sannadkan 2023 hirgaliyey waxqabad lataaban karo oo ay ugu mudan yihiin kuwan hoos ku taxan:

1. Waxqabadka Dhinaca Shuruucda Ee Sannadka 2023
2. Samaynta Qorshaha Istaraatiijiyadeed Ee ALGASL 2023-2027
3. Doorarka Iyo Mas'uuliyadaha Golayaasha Dawladda Hoose Ee Maaraynta Khatarta Musiibada
4. Shirwaynaha Ku Saabsan Maaraynta Khatarta Musiibada Ee Heer Deegaan
5. Tababarka Maareynta Qashinka Ee Waaxda Arrimaha Bulshada
6. Tababarka Xalinta Khilaafadka Dhulka
7. Tageeradda Masiibadi Ka Dhacday Suuqa Wajaale
8. Tageeradda Hormarinta Degmadda Baki
9. Ka Qayb Qaatay Nabadaynta Deegaanka Cali Saahid Ee Gobolka Togdheer.

WAXQABADKA DHINACA SHURUUCDA EE SANNADKA 2023

Ururka ALGASL ujeedooyinka uu ujiro waxa ugu muhiimsan hirgalinta Shuruucda Maamul Daadajinta, Ka hortaga iyo ka ololaynta Shuruucda Caqabadaha ku ah Dawladaha Hoose, sannadka 2023 Ururku waxa uu ka shaqeyey talooyinka ka soo jeediyey Xeerar iyo Wareegtooyin ka soo baxay Hayaadaha kala duwan ee Dawlada waana kuwan Xeerarka ugu muhiimsan ee sannadkan uu Ururku ka shaqeyey talooyinka sharci ee Dawladaha Hoose u danta ahna ka bixiyey:

1. Waxa uu Ururku ka shaqeyey Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr.23/2019, iyada oo la calaamidayey dhamaan qodabada caqabadaha ku ah Dawladaha hoose waxaana la diyaariyey qabyo qoraal oo laga saaro waxkasta oo Caqabad ku ah Dawladaha Hoose , In lagu daro Qoddobo nasakhaaya Shuruucda ay wasaaraduhu curiyeen ee ay ku jiraan qoddobo caqabad ku ah Maamul Daadajinta iyo Dawladaha Hoose sida (Xeerka Liisamada Ganacsiga, Xeerka Qandaraasyada ,Xeerka Nabadgalyada, Xeerka Biyaha iyo Xeerka Maamulka Dhulka)waxaanu Ururku uruuriyey Xogo badan oo arrintan laxidhiidha waxaana lalawadaagay Maamulka Sare ee Ururka (Board of Directors)

2. Waxa uu Ururku ka Shaqeyey Guulna ka soo hooyey Wareegtooyin ka soo baxay Wasaaradaha Hawlaha Guud iyo Arrimaha Gudaha oo nuxur koodu ahaa in aanay Dawladaha hoose wax doora ku lahayn Maamulka Dhulka Danta Guud,si arrintaa looga saaro Meesha waxa uu ururka hawl galiyey Khubara sharci yaqaano ah iyo Xafiiska Shuruucda ee ALGASL, waxaana Madaxa Ururka Madaxwaynaha ugudbiyeen tala-dii Sharci ee Khubarada waxaana arrintan ka soo baxay arrin sulux ah oo ah in ay Dawladihii hoose maamulaan 15% dhulka danta guud ee Degsiimada ah halka Dawladii dhexe ay gacanta ku hayneyso dhulka loo qorsheeyey adeegyada danta guud ah sida iskuul , Xanaano iyo Warshad.
3. Waxa uu Ururku ka Shaqeyey Hindise Sharciyeed lagu Curinaayo Masuuliyadka iyo Doorarka Waxaaha Diwaangalinta iyo Jinsiyada iyo Latacaalida Khataraha iyo Masiibooyinka iyada oo la doonaayo in lagu dhexdaro Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr.23/2019
4. Waxa uu ururku ka shaqeyey Xeerarka Horyaala Golaha Wakiilada oo ay qaarkoodna ansaxeen qaarna golalaha horyaalaan Xeerarka golaha horyaala ee ururku talada ku darsaday hadda socda waxa kamid ah:

- Xeerka Ciidanka Dabdamiska
- Xeerka Maamulka Maaliyada

Xeer Lr.75/2019 oo wax kabadal iyo kaabisi ku socoto.

- Mashuurca Sharciga Jidaynta kabka horumarinta Gobolada Bariga
- Xeerka waddo Marista Gadiidka.

QORSHAHA ISTARAATIJIYADEED EE ALGASL 2023-2027

Ururka ALGASL ayaa waxa uu ka shaqeyey sannadkii 2023, qorshaha Istaraatiijiyadeed ee oo uu Ururku ku shaqayn doono 2023-2027, waxa dib u eegis lagu sameeyey Istaraatiijiyadii hore ee dhamaatay ee Ururku ALGASL ku shaqaynaayey sannadihii 2018-2022,waxaana Diirada lagu saaray waxyaabihii ka qabsoomay Mudnaaninihii hore ee ku jiray istaraatiijadii dhamaatay , waxana xog uruurinla laga sameeyey dhamaan degmo doorashooyinka xubnaha ka ah Ururka ee ALGASL xog uruurintaas oo la jaan qaadaysa Himilooyinka ,Aragtiyaha iyo ujeeddadeeda guud, Iyo Mabaadida dastuuriga ah. Waxaana guud ahaan ka soo baxay in uu Ururka ka shaqeyo Lixdan Mudnaannood, waxaana ansixiyey Board ka Ururka waana kuwan hoos ku taxan Mudnaananaaha uu Ururku ku shaqayn doono:

1. U ololaynta iyo u doodista Danaha Dawladaha Hoose iyada oo laga shaqayn doono sidii loo suura galin lahaa maamul daadejinta adeegyada Aasaasiga ah.
2. In la tayeeyo Dawladaha Hoose Xagga Aqoonta iyo Xagga adeegbixintaba
3. Horumarinta Dhaqaalaha Maxaliga ah (LED)
4. In lala tacaalo Masiibooyinka ka dhasha isbadalka Cimilada.
5. In la kobciyo Maamul wanaaga si loola jaanqaado Isbadalka dhaqan dhaqaale.
6. Istaraatiijiyadan oo shaqayan doonta muddo 5 sanno ayaa waxa laga soo dheeganayaa qorshayaasha sannadlaha iyo kuwa bilah ah ee uu ururku ku shaqayn doono

iyada oo la rajaynaayo in ay waxbadan ka tari doonto duruufaha ku xeeran Dawladaha Hoose iyo bulshawaynta ay udeegaan

SHIRWAYNAHA MAAREYNTA KHATARTA IYO MUSIIBOYINKA HEER DEGMO

Ururka Dawladdaha hoose iyo Haayada VNG oo iskaashanayaa waxay qabteen Shirwayne lagaga Arinsanaayo sidii ay Degmooyinka wadanka oo dhami qayb uga noqon lahaayeen Dadaalada loogu jiro Kajawaabida marka ay Aafo Dhacdo. Intii uu shirku Socday Waxa ay Degmooyinka Hargeysa iyo Burco la wadaageen Degmooyinka kale ee dalka wixi ugu qabsoomay arimaha la xidhiidha maraynta afooyinka ee heer degmo iyo qorshayaasha uga yaal maraynta masiibooyinka ee degmooyinkooda. Sido kale waxaa laysla qatay in ay muhiim tahay in degmo walba laga Aasaaso xafiis laa tacaala Arrimaha Masiibiyinka .

Ujeedada loo qabtay Shirkan ayaa waxay ahayd in ay Degmooyinku fikir ka haystaan sida loola tacaalo Marka ay Aafo dhacdo iyo sida looga hortago marka ifafaalaheeda la arko, ujeedada kale ayaa waxay ahayd in la ogaado faa'iida iyo wixi ay uyeesheen Bulshada Xafiisyada latacaalida khataraha iyo masiibooyinka ee laga Aasaasay Degmooyinka wadana iyo wixii uqabsoobay intii ay Xafiisyadani shaqaynaayeen,ugu danbayn waxa looga danlaaha shirkan sidii degmooyinka wadan oo dhami ay masuuliyada iskaga saari lahaayeen la tacaalida khataraha inta kaga aadan ee heer degmo iyo in ay samaystao degmo kastaa cid uga maasuula arrintan.



TOOBABARKA DOORARKA IYO MAS'UULIYADHA GOLAYAASHA DAWLADHA HOOSE EE MAARAYNTA KHATARTA MUSIIBADA

Maareynta Khatarta Musiibooyinka (DRM) ayaa door muhiim ah ka ciyaarta xaqiijinta adkeysiga iyo fayo-qabka bulshooyinka ku nool Hargeysa iyo Burco ee Somaliland. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jirta baahilo qabo in la xoojiyo awoodda xildhibaanada Golayaasha Deegaanka ee degmooyinkan si ay si hufan u gutaan doorkooda iyo waajibaadkooda la xidhiidha maareynta khataraha. Hadaba si looga jawaabo baahida aah in Golayaasha Deegaanka lasiiyo aqoon la xidhiidha khatarta masiibooyinka iyo sidii loola tacaalilahaa ayaa waxa loo qabtay Tababarkan oo awood u siin doona xildhibaanada barashada xirfadaha iyo aqoonta lagama maarmaanka u ah horumarinta iskaashiga latacaaliada Aafooyinka , maadaama oo Golayaasha Deegaanku ayaa safka hore kaga jiraan go'aan qaadashada iyo maamulka heer deegaan. Toobabarkan intii uu socday waxa la baray Xildhibanadii ka soo qayb galay sida loo maareeyo khatarta marka ay aafu dhaco ,sida looga hortago iyo sida loogu adkaysto loogana soo kabto Aafada dabadeed, waxa kale oo xildhibaanada lagu baraarujiyey masuuliyadaha Sharci ee Saaran ee ku xusan Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka ee Xeer Lr.23/2019, guntii iyo gabagabadii waxa la isla qatay in ay mudanayaashu ay qaataan doorkooda iyaga oo bogaadiyey Xafiisyada iska kaashaday Toobabarkan.

TABABARKA MAARAYNTA QASHINKA

Si loo xoojiyo Dawladaha Hoose, Ururka Dawladaha Hoose ee Somaliland (ALGASL) waxa Masuuliyadi ka saarantahay sidoo loo kobcinlahaa Awooda ilaalinta Fayo qabka Bulshada, Adeeg bixinta, fulinta Mashaariic wax ku ool ah, Qorshaynta shaqada sanadlaha ah iyo udoodista Dawladaha Hoose waa shaqooyinka ugu muhiimsan ALGASL. Iyada oo laga duulaayo Badqabka Bulshada iyo in ay Dawladaha Hoose yeeshaan aqoon iyo Xirfad ay ku maareeyaan Qashinka iyaga oo kaashanaaya Bulshada qayba heeda kala duwan ayaa Ururka Dawladaha Hoose waxa uu Qabtay Degmooyinka Wadanka Tababar ah sida loo Mareeyo Qashinka. Ujeedada tababarku waxa ahayd kobcinta, dhiirigelinta xirfadaha aqooneed ee Dawladda Hoose uleeyihiin Maaraynta Qashinka iyo in ay iyaga dhexdoodu kala bartaan sida ay ulatacaalan qashinka, guulaha ay ka gaadheen sida ay degaanadoodu u noqdeen kuwo nadiifa oo ay bulshadu ku noolaan karto, Caqabadaha haysta, sida ay uxaliyaan Mashaakilaadka ka dhasha qashika iyo hadii Xanuuno dilaacaan sida loo xaliyo Dhanka kale, tababarkani waxa u jeedooyinkiisa kamid ahaa in bulshada lagu baraarujiyo dhibta ka dhalata hadii qashinka la dugsado oo la iska maarayn waayo, waxaan fariin guud loo diray bushada fariintan oo ahayd inta uu qashinku kuu jiro ayuu Xanuunkuna kuu jiraa. Tababarkan oo dhacay Oktoobar, 1, 2022, ALGASL waxa lagu marti-qaaday dhammaan Degmo doorashooyinka

waxaana ka soo qayb galay 20 degmo, iyada oo ay degmo walba ka socdeen 2 xubnood, tababarkan maaraynta Qashinka waxa lagu qabtay Degmada Hargeysa waxaana bixnaayey khabiiro aqoon dheer u leh Maaraynta qashinka iyada oo ujeedada uwayni ahayd sidii loo maarayn lahaa qashinka maadaama oo uu qashinku keeno Xanuuno halis ku keeni kara badqabka iyo fayo dhawrka, tababarkan oo seddex cisho socday waxa lagu bartay waxa ugu muhiimsanaa:

1. In labaray degmooyinka sida loo maareeyo qashinka iyo inla kala saaro qashinka Dereeraha iyo Adkahaba.
2. In ay degmooyinku kala bardeen sidii ay umaareeyaanka qashinka maadaama oo ay degmo waliba si gaara uqaado, qaarkoodna ay shirkado madaxbanaani guraaan qashinka.
3. In Wacyigalin Balaadhan la siiyo Bulshada oo ay Dawladaha Hoose kala shaqeeyaan Maaraynta Qashinka.
4. Ugu Danbayn Toobabarkan oo way ka soo qayb galeen 40 Xubnood oo shaqaalaha oo kala socday 20 degmo doorasho waxa uu ahaa Toobabar loo baahnaa waxaana la isla qaatay in ay degmo waliba si aqooneysan u maarayso qashinka, bulshada wacyi galin guud oo maaraynta qashinka ah lasiiyo.

TABABARKA IYO AQOON ISWAY-DAARSIGA XALINTA KHILAFAADKA DHULKA

Tababarka Xallinta Khilaafaadka Dhulka oo ay soo qaban-qaabisay ALGASL, oo ujeeddadiisu ahayd in ka soo qayb galayaasha oo ahaa Agaasimayaasha Dhulka iyo Xildhibaanada u qaabilsan Degmooyinka Arrimaha Hawlaha guud iyo dhulka lagu tababaro xirfaddaha lagama maarmaanka u ah sida loo mareeyo murannada dhulka ee la xidhiidha lahaanshaha dhulka, helitaanka, is-

ticmaalka iyo horumarinta adeegyada arrimaha dhulka, kulan oo qaabaysnaa qaab Aqoon-is-weydaarsi maadama oo ay degmooyinku kukala duwan yihiin sida ay umaareeyaan, unaxaliyaan muranada ka soo baxa arrimaha dhulka oo la adeegsanayo habab kala duwan iyada oo diiradda lagu saaray kobcinta faham wax ku ool ah iyo adeegsiga xirfadaha xallinta khilaafaadka ee meelaha muhiimka ah. Natiijooyinka ka soo baxay tababarku waxa ay ubadnaayeen kor uqaadida xagga aqoonta iyo xirfadaha lagu la tacaalaayo murannada dhulka ee magaalooyinka, iyo kordhinta wada shaqaynta iyada oo loo marayo habka ugu wanaagsan ee la wadaago, waxyaabaha kale ee muhiimka ah ee lagu bartay Aqoon is waydaarsigan waxa ahayd in la qaabeeyo qaab-dhismeedka waaxaha dhulka, Daraasaynta sharciga iyo hirgelinta barnaamijyada wacyigalinta bulshada si loo yareeyo khilaafaadka dhulka si looga badbaado dilka iyo waxyeelooyinka innag soo gaadha Arrimaha dhulka. Waxyaabaha wax ku oolka ah ee sida gaarka ah loogu bartay kulan waxa kamid ahaa:

1. In Fahamguud laga qaato noocyada muranka dhulka.
2. In la qeexo sida loo xalinaayo muranada dhulka.
3. In labarto doorka Dawladaha Hoose ee arrimaha dhulka.
4. In labarto Shuruucda khuseeya Arrimaha dhulka iyada oo la kala qeexaayo waajibadyada Dawladaha Hoose iyo Dawlada dhexe.



MAGAALO MAGAZINE

5. In ka soo qayb galayaasha laboro Xirfadaha lagu la tacaalaayo yaraynta muranka dhulka.
6. In lakala Xadeeyo Awoodaha iyo Masuuliyadaha Golaha deegaanka iyo Shaqaalaha Farsmada dhulka.

Gabagabadii kulankan oo ahaa mid si heersare ah loo diyaariyey oo ay fuliyeen khabiiro Arrimaha Dhulka oo ay waheliyaan shaqaalaha Ururka Dawladaha Hoose waxa uu ahaa kulan midho dhal ah oo wax wayn ka tari doona Maaraynta Iyo Xalinta Muranada Dhulka oo ah Aafo ubaahan in si mug dheerloo xaliyo.

URURKA DAWLADHA HOOSE EE SOOMALILAND (ALGASL) OO LIX BOQOL OO KUN KAGA JAWAABAY MASIIBADII KADHACDAY SUUQII WAJAALE

Ururka Dawladaha Hoose ee Somaliland (ALGASL) ayaa si deeqsinimo ah ugu deeqay lacag dhan \$600,000 (lix boqol oo kun oo dollar) si loogu caawiyey suuqa Wajaale ee uu dabku baabi'iyay. Dhacdadani khasaaraha badan dhaliyay ayaa burburisay 74 goobood oo ganacsi, taasoo dhibaato weyn ku keentay dadka ay dhibaatooyadu saameysey iyo bulshada deegaanka. Arrintan taageerada ayaa ah mid wax wayn Katari doonta sidii ay usoo kaban lahaayeen muwaadiniintii ganacsigoodu ku baaba'ay, waxaaneey arrintani muujisay sida Dawladaha



JANUARY 2024

hoose ee dallku iyo Xafiiskooda Ururka Dawladaha Hoose ee ay ku midaysan yihiin ugarab taagan yihiin dadkooda iyo deegaankoodaba, arrintan taageerada waa mid kamid ah Tiirarka iyo ujeedooyinka Ururka loo dhisay.

URURKA DAWLADHA HOOSE OO TAAGEERAY DEGMADA BAKI

Ururka Dawladdaha Hoose ee ALGASL waa Urur ay ku midaysan yihiin Degmo doorashooyinka wadanka JSL, sababaha uu loo Aasaasay ALGASL



na waxa kamid ah in ay degmooyinka is taageeraan haday noqoto Qalab, Aqoon iyo Maaliyadba iyada oo arrintan laga duulaayo ayaa waxa uu Ururku Tagaaro umuujiyey Degmada Baki oo ka waday mashruuc balaadhan oo ah wadada isku xidhaysa guud ahaan degaanka baki iyo degmada Boorama. Maadaama ay Degmada baki wayday mashruuc wax ka tarayaaya kaa-bayaasha dhaqalaaha oo ah waddo marka la dhamaystiro fududayneysa isku socodka gadiidka iyo badeecadaha u ogalagooshaaya guud ahaan wadanka maadama oo ay degmadani kamid tahay meelaha ay ka soo baxaan khudaarta wadaniiga ah sidoo kale ay tahay goob ku wanaagsan xoolo dhaqida ayaa Ururka ALGASL waxa uu go'aansaday in uu gacan ka gaysto Dadaalkan ay degmadu wado waxaan degmada laga taageeray in loo kireeyo Cagaf ka qayb qaadata waddo bananeynta iyada mudada

loo kireeyey ahayd muddo 20 cisho. Cagaftan loo kireeyey degmada Baki oo ay kharashkeeda iska kaashadeen degmooyinka wadanka ayaa wax wayn katartay sidoo loo baneyn lahaa wadada oo ay adkayd in macadaadka ay degmadu ku shaqayneysay aaney cagaftan la'aanteed suuralgal noqoteen maadaama oo Meesha laga shaqaynaayey ay ahayd buuraley ubaahan in dhagaxa la jabiyo, waxaaneey muujisay arrintani sida fiican ee ay degmooyinka wadanku isku taageeraan.

URURKA DAWLADHA HOOSE OO KA QAYB QAAATAY NABADAYNTA DEEGAANKA CALI SAAHID EE GOBOLKA TOGDHEER

Maadaama oo ay Ururka Dawladaha Hoose ay ku midaysanyihiin dhamaan Degmo Doorashooyinka Dalka JSL, Shaqooyinka Dawladaha Hoosana ay kamid tahay ilaalinta Nabadgalayadda si ay bulshadu xasilooni iyo horumar u hesho ayaa Ururka waxa uu ka qayb qaatay Shirarkii iyo Wacyigalintii lagu nabadaynaayey colaadaha iyo Shaqaaqooyinkii sababay in dhimasho iyo barakacba ku yimaado dadkii ku dhaqnaa degaankii ay colaadu ka dhacday. Ururku isaga oo gudanaayo waajibadkiisa waxa uu Abaabulay Waxgaradka, Culimada, Siyaasiyiinta, Maayirada ay deegaankooda saamaysay iyo dhamaan cidkasta oo lagu tuhmayey in arrintan daminteeda ay qayb ka qaadan karaan arrintana sifiican ayay udhacday waxaana uu Ururku bixiyey dhamaan kharashkii ku baxay shirkii ka dhacay degmada Burco ee Gobolka Togdheer.

MAXAAD KA OGTAHAY MASHRUUCA DANWADAAG



Danwadaag waa mashruuc diiradda saaraya kor u qaadista kalsoonida bulshadu ku qabikarto dawladda. Mashruucu wuxu fulinaya adeegyo wax-tar leh oo laxidhiidha maareynta waxyeelooyinka masiibooyinka, iyada oo laga duulayo; taabogelinta xog-siinta bulshada, samaynta qorsheyaal, siyaasado iyo fulinta adeegyo loo dhanyahay. Mashruuca Danwadaag, isaga oo ka duulayan Maareynta waxyeelooyinka masiibooyinka waxa uu kor

u qaadis kusamaynayaa kalsoonida iyo wadashaqaynta ka dhaxaysa bulshada iyo dawladda.

Mashruuca Danwadaag waxa uu si dhow ula shaqeey, islamarkaan taageeraa Dawladaha Hoose ee Hargeysa iyo Burco, ururka ay ku bohoobeen dawladdaha hoose ee Somaliland ee ALGASL. Sidoo kale waxa uu mashruucani si dhow ula shaqeeyaa Hay'adda Kahortagga Masiibooyinka iyo Kaydka Raashinka (NADFOR) iyo

Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Mashruucu waxa uu ka taageeraa dawlahaha hoose iyo qaar kamid ah hay'adaha dawladda dhexe ee door-ka ku leh maareynta khataraha masiibooyinka, hirglinta nidaam isku dhafan oo looga gaashaanto khataraha masiibooyinka, nidaamkaas oo ay qayb kayihiin, bulshada, ururada bulshada rayidka ah, warbaahinta, dawladdaha hoose iyo dawladda dhexe, si loo dhiso bulsho adkaysi u leh khataraha masiibooyinka.



20 HAWL-WADEEN OO LOO CARBIYEEY BIXINTA IYO GUDBINTA TABOBARADA LA XIDHIIDHA MAAREYNTA KHATARAHA IYO MASIIBOYINKA

Hay'adda VNG International, Mashruuceeda DANWADAAG oo Kaashanaya The Hague Academy ayaa 20 hawl-wadeen ku tabobaray habka bixinta iyo gudbinta tabobarada la xidhiidha Maareynta Khataraha masiibooyinka, hawl-wadeenadan oo ka kala socday ; Hay'adda Kahortagga khataraha Masiibooyinka iyo Kaydka Raashink ee NADFOR, Dawladaha Hoose ee Hargeysa iyo Burco, Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, Ururka ay ku

bahoobeen dawladdaha hoose ee Somaliland ee ALGASL, iyo daladda ururada haweenka ee NAGAAD. Tabobarkan oo soo socday muddo 2 sano ah ayaa la soo afmeeray qaybtii u dambaysay bishii August, 2023. Qaybtan oo tabobarayaasha Maareynta Khataraha lagu tabobarayey hoggaaminta iyo maareynta isbeddelada. Hawl-wadeenada latabobary waxa loo diyaariye in ay bixinkaraan tabobarada iyo aqoonta la xidhiidh maareynta khataraha ka dhalankara masiibooyinka, si kor

loogu qaado aqoonta iyo wacyiga hay'adaha ku lugta leh maareynta khataraha masiibooyinka, loona dhiso bulsho adkaysi u leh waxyeelooyinka masiibooyinka.

QORAAGA
MAXAMED CALI DUBBE
VNG INTERNATIONAL

HAY'ADDA CAALAMIGA AH EE VNG OO 182 QALABKA DAB-DEMISKA AH U QAYBISAY DAWLADAHHA HOOSE EE HARGEYSA IYO BURCO

Masiibadii dabka ee ka dhacday Suuqa Waaheen sannadkii 2022 waxa ay daaha ka rogtay khatarta dabka ee markasta dhicikarta iyo habacsanaanta suuqyada, meheradaha iyo guryaha. Sidaa darted, iyada oo laga duulayo casharadii laga bartay gubashadii suuqa Waaheen, Mashruuca Danwadaag qaybtiisa ay fuliso Hay'adda Caalamiga ah ee VNG International, waxa ay Bishii October u qaybisay Dawlada Hoose ee Hargeysa iyo Dawladda Hoose

ee Burco 182 qalabka dab-demiska qaybihiisa kala duwan . Qalabkan dab-demiska ee la qaybiyey ayaa loogu talagalay Xarumaha Dawladaha hoose iyo xafiisyada degmooyinka kala duwan ee Hargeysa iyo Burco. Ujeeddada qalabkan ayaa qayb ka ah qorshaha lagu xoojiano u diyaargarowga iyo ladagaalanka khatarta dabka, iyo in ay dawladdaha hoose tusaale fiican u noqdaan bulshada inteeda kale, si ay samaystaan qorsheyaal looga hortago khatarta dabka, oo ay kamid tahay in qalabka dab-demiska

la dhigo meheradaha ganacsiga, xafiisyada iyo guryaha, laguna tabo baro shaqaalaha isticmaalka qalabka dab-demiska, si loo hubiyo badbaadada dad iyo duunyaba. Qalabka dab-demisku waxa uu suurtagelinkaraa in si sahlan loo xakameeyo loona demiyo haddii uu dab kaco, hasayeeshee, la dagaalanka dabku waxa ay u baahan tahay qorshe intaa ka balaadhan, si looga baaqdo masiibadii suuqa Waaheen oo kale in ay markale dhacdo.

MASHRUUUGA DANWADAAG AYAA SOO QABANQAABIYEEY DOOD-WADAAGG KUSAABSAN KAHORTAGGA IYO MAAREYNTA KHATARAHA MASIIBOYINKA OO KA QABSOOMAY HARGEYSA IYO BURCO BISHII OCTOBER

Hay'adda Caalimiga ah ee VNG International oo kaashanaysa Ururka Dawladda Hoose ee Somaliland (ALGASL) ayaa dood wadaag ku saabsan kahortagga iyo maareynta khataraha masiibooyinka u qabatay wakiilo kabadan 50 oo kala socday Dawladda Hoose ee Hargeysa, Dawladda Dhexe, shirkadaha bixiya adeegyada Gaast, qalabka ka hortaga dabkba iyo kuwa

korontada, saxaafadda iyo ururada bulshadda. Kulankan oo lagu gorfeynayey door-ka iyo waajibaadka ay kalaleeyihiin daneeyayaasha kala duwan ee la xidhiidha kahortagga iyo maareynta khataraha masiibooyinka. Waxa si faahfaahsan loogu lafo-guray feejignaanta iyo u diyaargarowga khataraha ka dhalankara isbeddelka cimilada oo ay kamid tahay roobabka

lasaadaalinayo in ay ka da'aan qaybo kamid ah Somaliland ee El Nino.

QORAAGA
MAXAMED CALI DUBBE
VNG INTERNATIONAL



AQOON-KORODHSI IYO KHIHRAD-WADAAG KU SAABSAN MAAREYNTA KHATARAHA MASIIBOYINKA OO AY MAS'UULIYIIN KA TISAN DAWLADDAHA HOOSE IYO DAWLADDA DHEXE EE SOMALILAND U TEGEEN DALKA TURKIGA

Uururka Dawladda Hoose ee Dalka Holland ee VNG International oo kaashaneysa Ururka Dawladda Hoose ee Somaliland ee ALGASL ayaa safar aqoon korodhsi ah ka taageertey madax ka kala socotey qaar ka mid ah Hayaddaha Dawladda ee Mashruuca Danwadaag taageero. Madaxda oo ay ka mid yihiin Gudoomiyaha Hay'adda NADFOR, Mudane Faysal Cali Sheekh, Maayirka Caasimada Hargeysa, Mudane Cabdikarim Ahmed Mooge, Maayirka Degmadda Burco, Mudane

Cabdirisaaq Ibrahim Cabdi (Hero), Agaasimaha Ururka Dawladda Hoose ee ALGASL, Mudane Khalid Cabdi Xirsi, iyo saraakiil ka socotey VNG International iyo Media Ink. Safarkan aqoon-korodhsi oo qaatay muddo todobaad ah, waxa ay mas'uuliyiinta Somaliland la kulmeen dhiggooda dalka Turkiga sida masuuliyiinta u sarreysa Hay'adda Mucaawinooyinka ee TIKKA, Diyanat, Mayorka Degmadda Keçiören ee Caasimadda Ankara. Waxa ay labada dhinac isweydaarsadeen khibrado iyo waayo-aragnimo la

xidhiidha siyaabaha habboon ee loo maareeyo khataraha masiibooyinka, si loo yareeyo khasaaraha ka dhalankara masiibooyinka, loona dhiso bulsho adkaysi leh oo u diyaarsan kahortagga iyo xakamaynta khataraha masiibooyinka, sida; abaaraha, daadadka, dabk, duuftaanta, cudurada faafa iyo wixii lamid ah.

QORAAGA
MAXAMED CALI DUBBE
VNG INTERNATIONAL



Memorandum of Understanding or Partnership and Cooperation between the Democratic Republic of Ethiopia and Somalia



SOMALILAND ON THE PATH TO INTERNATIONAL RECOGNITION

Somaliland, a self-declared sovereign state in the Horn of Africa, stands as a testament to resilience and democracy. Despite having all the attributes of a nation, including its flag, currency, passport, and stable government, the international community continues to overlook its quest for recognition.

HISTORICAL BACKGROUND

Somaliland's history dates back to its independence from British rule

in 1960.

A voluntary union with Somalia followed, envisioning a greater Somali Republic. However, after 31 years of tumultuous coexistence marked by war, injustices, and inequalities, Somaliland declared its independence in 1991.

What ensued was a miraculous journey, establishing Somaliland as arguably the most democratic and politically stable nation in the Horn of Africa.

THE DEMOCRATIC OASIS.

Somaliland's commitment to democracy is deeply rooted in its culture. Since 1991, the nation has witnessed a series of democratic elections characterized by peaceful transfers of power.

Notably, the recent election of five different presidents and the historic electoral incident in 2003 reflect Somaliland's dedication to political stability.

SOMALILAND'S UNIQUE STATUS.

Contrary to misconceptions, Somaliland has never been part of Somalia. The union, albeit never legally binding, ended in 1991 after years of difficulties and a devastating war against Somalia's military regime.

Somaliland's sovereignty is underscored by its well-defined borders based on international treaties.

IMPACT OF SOMALIA'S INSTABILITY.

While Somaliland has effectively managed to control terrorism and piracy within its borders, it has faced challenges due to the prolonged instability in Somalia.

The region has become a haven for refugees fleeing conflict-ridden Somalia, highlighting the broader consequences of regional conflicts.

JUSTIFICATION FOR RECOGNITION

Somaliland's quest for recognition is rooted in its historical achievements. Recognized by 34 countries, including permanent members of the UN Security Council, Somaliland adheres to the Montevideo criteria of statehood.

Recognition, though important, is seen as a means to contribute more effectively to international platforms.

IMPACT OF NON-RECOGNITION.

Recognition alone does not guarantee prosperity. Many recognized nations face instability and economic challenges. However, Somaliland has engaged as a sovereign nation, hosting diplomatic missions, establishing relations, and participating in international agreements, showcasing its resilience despite the lack of formal recognition.

INTERNATIONAL ENGAGEMENT.

The recent visit of U.S. government officials to Somaliland is seen as a positive development, raising hopes for future recognition.

Such engagements contribute to the ongoing efforts to attain international recognition.

CALL TO AFRICAN GOVERNMENTS.

The call to African governments echoes the sentiments of the Somaliland people and the AU fact-finding mission. The recognition of Somaliland can serve as a beacon of de-

mocracy, offering a different image of Africa and inspiring other nations to uphold democratic values and human rights.

CONCLUSION.

As Somaliland continues its quest for recognition, these insights shed light on the nation's unique journey, challenges, and aspirations. The hope remains that Somaliland's recognition could be a catalyst for stability in the Horn of Africa, benefiting both Somaliland and its neighbouring Somalia.

ALGASL

MAGAALO

MAGAZINE



URURKA DAWLADHA HOOSE EE SOMALILAND (ALGASL)

DESIGN BY: ABDILAHY MOHAMED